Waxbarashada Gaarka Ah
… Waa adeeg, ma aha goob

Ogeysiiska Waxbarashada Gaarka ah Dhowritaanka Nidaameed Looguna Talagalay Ardayda iyo Qoysaskooda.

Waxayaabaha lagu Farayo Markay Hoos Timaad Qaybta B ee Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafonimada leh, Sharciyada Dowladda Federaalka ah, iyo Xeerarka Gobolka uga Yaal Waxbarashada Gaarka ah

Randy I. Dorn
Agaasimaha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha Gobolka

Dib loogu noqday Ogast 2009

RussTech
Somali_WAE2049f
22 October 2009

Ogeysiiska Waxbarashada Gaarka ah Dhowritaanka Nidaameed Looguna Talagalay Waalidiinta iyo Qoysaskooda

Waxbarashada Gaarka Ah
Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
Dr. Douglas H. Gill
Maareeyaha Waxbarashada Gaarka

Randy I. Dorn
Agaasimaha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha

Ken Kanikeberg
Madaxa Shaqaalaha

Bob Harmon
Ku Xigeenka Kormeeraha Guud
Barnaamijyada Gaarka iyo Xisaabtanka Federaalka ah

Dib loogu noqday Ogast 2009

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

Macluumaad intaa u dheer waxa meesha ku jira waxyaabaha ku saabsan ee dukumentigan, fadlan kala xirii:
Waxbarashada Gaarka ah, OSPI (Special Education, OSPI)
E-mail: speced@k12.wa.us
Taleefan: (360) 725-6075

Dukumentigan waxa laga heli karaa internetka halkan:
http://www.k12.wa.us/SpecialEd/publications.aspx

Fadlan tixraac lambarka hoosta ku yaal ee dukumentiga si laguugu adeego si dhakhso leh:
09-0025

Waxa la heli karaa foomkan oo qaab kale ah haddii la codsado.
Kala Xiriir Xarunta Kheyraadka taleefanka (888) 595-3276, TTY (360) 664-3631.

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha ayaa u heellan inay fuliyaan u-sinnaanta fursadaha dhammaan barnaamijyada,waxqabayada iyo shaqadaba oo loo hoggaansamo si buuxda sharciyada federaalka iyo kuwa gobolkaba ee manuucaya ku takoorka qofkana iyadoo sabab looga dhigayo jinsiyad, midab, qowmiyadda uu ka soo jeedo, diinta, lab/dheddig-nimo, u-jeedka hamadeed, diin, heerka ciidamada ka tirsanaanta, da'da, amase naafanimo

Macluumaadka Guud **1**
Horudhac 1
Ayaa Loogu Talagalay Ogeysiiskan 1
Waxbarasho Dowladeed oo Habboon oo Lacag La'aan ah (FAPE) 1
Wixii Macluumaad Dheeraad Ah 2
Ogeysiiska Dhowritaanka Nidaameed **2**
Ogeysiika Qoran ee Hore **2**
Luqadda Hooyo **4**
Waraaqaha Lagu Diro Habka Elektiroonigga ah **4**
Oggolaansho Waalid – Qeexitaan **4**
Oggolaansho Waalid –Waxyaabaha Looga Baahan Yahay **5**
Oggolaanshaha Qiimaynta Hore 5
Xeerka u Gaarka ah ee Qiimaynta Hore ee (Ardayda) Gacanta Ugu Jirta Gobolka 5
Oggolaanshaha Waalidka ee Loogu Talagalay Adeegyada Hore iyo Kala-Noqoshada Oggolaanshaha Sii Socodka Adeegyada 6
Oggolaanshaha Waalidka ee Loogu Talagalay Dib-u-Qiimaynta 7
Diiwaangalin Lagu Caddeynayo in la Sameeyey Dadaal Macquul ah oo Lagu Raadinayo Oggolaanshaha Waalidka 8
Macluumaadka Kale ee Oggolaanshaha 8
Qiimaynta Madaxa-Bannaan ee Waxbarashada **9**
Qeexitaanno 9
Xaqa Waalidku u Leeyahay Qiimaynta Kharashka Dawladdu Bixiso 9
Qiimaynta u Waalidka Bilaabay 10
Codsiyada Qiimeynta Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) 10
Shuruudaha Degmada Dugsi 10
Ka Qeybqaadashada Waalid **10**
Heshiisyada ka Dhexeeya Adiga iyo Degmadaada ee Khuseeya Kulannada IEP iyo Dib-u-Qiimeynta **11**
Kulanka Heshiisyada IEP 11
Heshiiyada Dib-u-Qiimaynta 12
Foomka Ka-Noqoshada Heshiiyada 12
Ka Wareegga Xuquuqda Waalidnimo Da'da Qaan-Gaarka **12**
Xogdhowrka Macluumaadka **12**
Shaqi Ahaan Loo Garan Karo **13**
Xuquuqda Marin-u-Helka **14**
Diiwaanka Marin-u-Helkiisa 15
Diiwaannada Laga Hayo Halka Ilmaha ah Waxa ka badan 15

Liiska Noocaca iyo Goobaha Macluumaadka 15
Ajuurada (Fees) 15
Sixidda Waxa Diiwaanka ku Qoran Markuu Codsado 15
Fursad La isku Siiyo Dhageysi Iyo Natiijooyinka Dhageysiga 15
Oggolaansho Daah-uga-Qaadka macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Karo 16
Dhowritaannada macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Karo 17
Burburinta, Haysiga iyo Keydinta Macluumaadka 17
Qaabsocodyada Xallinta Khilaafka Waxbarashada Gaarka ah 17
Dhexdhexaadin 18
Guud Ahaan 18
Eex-la'aanta Dhexdhexaadiyaha 19
Faraqa u Dhexeeya Dhageysiyada Qaabsocodka Nidaamka xuquuq dhowrka leh iyo Baaritaannada Cabashada Muwaaddin ee Waxbarashada Gaarka ah 19
Qaabsocodyada Cabashada Muwaaddinka 20
Xereynta Cabashada 20
Baaritaanka Cabashooyinka 20
Baaritaanka, U-Dheereynta, Go'aanka Qoran 21
Xallinta Cabashada 21
Cabashooyinka Muwaaddin ee Waxbarashada Gaarka ah iyo Dhageysiyada nidaamka xuquuq dhowrka leh 21
Qaabsocodka Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka leh 22
Guud Ahaan 22
Xereynta 22
Ogeysiiska loo Baahan Yahay Ka hor Codsiga Dhageysiga Xuquuq Dhowrista Sharci leh 23
Kaafinimada Codsiga Dhageysiga 23
Wax Ka Beddelka Codsiga Dhageysiga 23
Jawaabta Degmada ee ku Wajahan Codsiga Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista leh 24
Jawaabta Dhinaca kale ee ku Wajahan Codsiga Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista leh 24
Foomamka Tusaalaha ah 24
Meeleynta Ardayga Marka Dhageysiga Nidaamka xuquuq Dowrka leh La Sugayo 25
Nidaamka Xallinta 26
Kulanka Xallinta 26
Muddada Xallinta 27
Isku Hagaajinta 30ka-maalmood-Taarikheed ee Muddada Xallinta 27
Heshiiska Dajinta ee Qoran 28
Muddada Dib-u-Eegidda Heshiiska 28
Dhageysi Nidaam Xuquuq Dhowris Eex-La'aan Ah 28

Guud Ahaan 28
Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) 28
Mawduuca ku Saabasan Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista Leh 29
Jadwalka Loogu Talagalay Dhageysiga 29
Waxyaabaha ka Reebban Jadwaalka 29
Xuquuqaha Dhageysiga 30
Guud Ahaan 30
Macluumaad Dheeraad ah oo Daah-uga-Qaadka ku Saabsan 31
Xuquuqaha Waalid ee Dhageysiyada 31
Jadwallada iyo Ku Habboonaanta Dhageysiyada 31
Go'aammada Dhageysiga 31
Go'aanka Garsooraha (ALJ) 31
Micneynta Qodobka 32
Codsiga Gaarka ah ee Loogu Talagalay Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista leh 32
Natiijooyinka iyo Go'aanka Guddiga La-Talinta iyo Dadweynaha Guud 32
G'aanka Kama-Dambeynta; Rafcaanka 32
Tallaabooyinka Madaniga ah, oo ay ku Jirto Muddada Wakhtiga Lagu Xereynayo Ficilladan 33
Guud Ahaan 33
Xaddidka Wakhti 33
Qaabsocoyada Dheeraadka ah 33
Micneynta Xeerka 33
Kharashka (Ajuurada) Qareenka 34
Guud Ahaan 34
U Xukunka Ajuurada (Fees) 34
Qaabsocodyada Edbinta Ardayda U-Qalma Waxbarashada Gaarka ah 35
Xeerarka Hakinta iyo Eryitaanka ee Loogu Talagalay Dhammaan Ardayda 36
Awoodda Shaqaalaha Dugsi 36
U Go'aaminta Kees-ka-Kees 36
Guud Ahaan 36
Awoodda Dheeraadka ah 37
Adeegyada 37
Beddelka Meeleynta Sabab Ka-Kaxaymo Edbin 38
Wargalinta 38
Astaanta Go'aaminta 39
Go'aaminta in Anshaxu Yahay Wax ka Yimid Naafonimada Ardayga. 39
Xaaladaha Gaarka ah 40

Qeexitaanno 40
U Garashada Goobta 40
Qaabsocodka Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka ee Edbinta 41
Awoodda Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) 41
Meeleynta Muddada Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka ee Dhakhsaha leh 42
Xaq Dhowritaanka Carruurta aan Wali u Qalmin Waxbarasahda Gaarka iyo Adeegyada la Xiriira 42
Guud Ahaan 42
Ku Saleynta Ogaanshaha ee Arrimaha Edbinta 43
Waxa ka Reebban 43
Shuruudaha lagu Dhaqmayo Haddii ayna Jirin Wax Lagu Saleeyo in Arrinta La Ogaa 43
U Diritaanka iyo Fulinta Ficilka Sharci Iyo Masu'uuliyiinta Maxkamadeed 44
Gudbinta Diiwaannada 44
Uga-Baahanida Meeleynta Goa'aan Dhinac Kaliya ah ee Waalidintu ay ugu Meeleeyaan Ardayada Dugsiyada Gaarka ah iyada oo Dowladdu Kharashka Qabto 44
Dib-ugu-Celinta Loogu Talaagalay ku Meeleynta Dugsiga Gaarka ah 44
Xaddidka Lacag Dib-ugu-Celinta 45
Khayraadka 45

Macluumaadka Guud

Horudhac

Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA) ee 2004 ayaa ah sharci federaal oo ka dhammaanad qaadaya inay helaan waxbarasho dowladeed oo ku habboon, oo lacag la'aan ah, ardayda naafonimada leh ee loo gartay ama loo go'aamiyey inay u qalmaan inay helaan adeegyo waxbarasho gaar ah. IDEA ayaa uga baahan inay dugsiyadu siiyaan waalidka ardayga u qalma ama loo diray waxbarashada gaarka ah iyada oo ay la socoto faahfaahin buuxda oo ah xuquuqda ay leeyihiin markay hoos timaad IDEA, Xeerarka Waaxda Waxbarashada Mareykanka iyo shuruudaha OSPI ee xukuma bixinta waxbarashada gaarka ah (Cutubka 392-172A Xeeka Maamuleed ee Washington (WAC)). Dukumentigan ayaa adeecsan Ogeysiiska Hannaanka Dhowritaanka Nidaameed ee yay leedahay Waaxda Waxbarashada Mareykanku (Ogast 2006).

Ayaa Loogu Talagalay Ogeysiiskan

Ogeysiiskan waxa loogu talagaly waalidiinta, waalidiinta beddelka ah, iyo ardayda qaan-gaarka ah. Tixraacyada "adiga" ama "waalidka' iyo 'ilmahaaga" ayaa waliba u dhigma waalidka beddelka ah iyo ardayda qaan-gaarka ah. Tixraacyada ogeysiiskan ee "degmo dugsi" ama "degmo' ayaa waxa ku jira haya'daha kale dadweyne, ee ay ka midka yihiin degmoonyinka adeegga waxbarasho (ESDs), haddii ay siinayaan ilmahaaga adeegyo waxbarasho gaar ah. Degmada dugsi ee siisa adeegyada ilmahaaga waxbarashada gaarka ah ayey IDEA ka rabtaa ogeysiis qoran oo ah ogeysiiskaaga dhowritaanka nidaameed, bixisana ilo adiga kaa caawiya inaad waxaas fahanto.

Waxbarasho Dowladeed oo Habboon oo Lacag La'aan ah (FAPE)

Markay hoos timaad IDEA, Waxbarashada Dowladeed oo Habboon oo Lacag La'aan ah (FAPE) micnaheedu waa waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira ee ilmahaagu u baahan yahay sidii u uga faa'iideysan lahaa isagu ama iyadu waxbarashadiisa(eeda). Haddii loo garto inuu u qalmo, ayaa ilmahaagu u heli kara adeegyo waxbarasho gaar ah laga bilaabo da'da saddexda sano illaa da'da labo iyo labaatan. Ilmahaagu u qalmitaanka waxbarashada gaarka kuma jirayo haddii isaga ama iyadu loo qiimeeyo oo loo go'aamiyo inuu inta wakhtigaas ka dambeysa una u qalmin waxbarashada gaarka ah, isaga ama iyada ayaa ku qalin-jabin doona diblooma dugsi sare oo caadi ah ka hor intuuna isagu ama iyadu ayna noqon 21 jir. Haddii u ilmahaagu u noqdo 21 waxa ka dambeeya Ogast 31, isaga ama iyada ayaa ku si jiri doona u qalmitaanka sannad dugsiyeeda waxa ka dhiman oo idil. Adiguna waliba waad ka noqon kartaa oggolaanshaha aad u bixisay ilmahaagu inuu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. Ardayda ku jirta xabsiga dadka qaan-gaarka ee goobta asluubta, ee u qalma waxbarashada gaarka ah, ayaa xaq u leh FAPE illaa da'da 18. FAPE ayaa lagu siin doonaa ilmahaaga sida xaddidka ugu yar leh sida lagu sifeeyey Barnaamijka Waxbarashada Qofka Gaarka Looga Dhigay (IEP).

Wixii Macluumaad Dheeraad Ah

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah iyo dhowritaan nidaameedka ayaa la heli karaa iyada oo lala xiriiro maamulaha dugsiga xaafaddaada ama maareeyaha waxbarashada gaarka ah, xarunta macluumaadka iyo tababbarka waalidka ee gobolka, “Partnerships for Action Voices for Empowerment” (Washington Pave) , ama iyada oo loo maro OSPI. OSPI ayaa maamusha bar internet oo kaga hadasha waxbarashada gaarka halkan: www.k12.wa.us/specialed. OSPI ayaa leh kormeerayaal barnaamij iyo ergeyga (ombudsman) waxbarashada gaarku inuu kaa caawiyo su’aalaha ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Waxaad kala xiriiri kartaa OSPI, Waxbarashada Gaarka ah taleefanka (360) 725-6075, TTY (360) 586-0126, ama speced@k12.wa.us.

Ogeysiiska Dhowritaanka Nidaameed
34 CFR 300.504; WAC 392-172A-05015

Adigu waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul ogeysiiskan ah hal mar sannadkii iyo wakhtiyada kale qaarkood.

Nuqul ogeysiiskan ah waa in lagu siiyaa (1) hal jeer dugsi sannadeed kasta, iyo: (2) U diritaanka hore, ama codsigaaga qiimeynta; (3) Helitaanka kowaad ee cabashada muwaaddin waxbarashada gaarka ee sannad dugsiyeed (4) Helitaanka kowaad ee codsi dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka ee sannad dugsiyeed. (5) Marka go’aan la gaaro tallaabo edbin oo ka taagan beddelka meeleynta; iyo (6) Marka aad codsato.

Ogeysiiskan dhowritaanka nidaameed waa inuu wataa faahfaahin buuxda oo ah dhammaan dhowritaanka nidaameed ee la xiriira ku meeleynta dhinac kaliya ka socda ee ilmahaaga lagu meeleeyo dugsi gaar ah iyada kharash dawladeed ku baxdo, qaabsocdyada cabashada muwaaddinka ee waxbarashada gaarka ah, oggolaanshaha warqabka ah, dhowritaanka nidaameed ee ku jira Qaybhoosaadka E ee Qaybta B ee ka midka ah xeerarka IDEA, iyo shuruudaha xogdhowrka macluumaadka ee ku jira Qaybhoosaadka F ee Qaybta B ee ka midka ah xeerarka IDEA. Degmoonyinka ayaa dooran kara inay u isticmaalaan ogeysiiskan ama ay soo saaran waalidiinta ogeysiis dhowritaan nidaameed iyagu ay iska leeyihiin.

Ogeysiika Qoran ee Hore
34 CFR §300.503; WAC 392-172A-05010

Adigu waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo macluumaad qoraal ah oo kuu faahfaahiya waxay degmada dugsi ku kacayso ama ayna ku kacayn markay saamaynta ku leedahay baahida waxbarashada gaarka ee ilmahaaga.

Degmadu waa inay ku siisaa macluumaad qoraal ah oo ku saabsan go’ aannada muhiimka ah ee saamyanta ku leh barnaamijka waxbarashada gaarka ee ilmahaaga. Tan waxa loo yaqaan ogeysiika qoran ee hore oo waa dukumenti ka soo jeeda **go’ aannada** lagu gaaray kulan ama degmadu ay gaartay iyada oo ka jawaabeysa

codsi aad adigu sameysay. **Degmada waxa looga baahan yahay inay kuu soo diraan ogeysiis hore oo qoran kadib go'aanka marka la gaaro, laakiin ah ka hor intaan lagu dhaqmin go'aanka.** Go’ aannadan la xiriira soo jeedin kasta ama diidtaan kasta oo ah in la bilaabo ama la beddelo garashada, qiimaynta, meeleynta, ama siinta FAPE ee ilmahaaga.

Ogeysiiska hore ee qoraalka ahi waa inay ku jiraan:

- Waxay degmadu soo jeedineyso ama diideyso inay qabato;
- Faahfaahin sababta degmadu u soo jeedinayso ama u diideyso inay tallaabo qaado;
- Sifeyn wax kala doorashooyin kale ee kooxda IEP ay qaddariyeen iyo sababaha loo diiday wax kala doorashooyinkan.
- Sifeyn qaabsocodka qiimayn kasta, qiyaasta, diiwaanka ama warbixinta loo isticmaalay saldhig ahaan tallaabada.
- Sifeyn qodobada kale oo kasta ee la xiriira tallaabda dugsigu qaaday.
- Sifeyn qaabsocodka qiimaynta degmadu soo jeedineyso sidii ay u sameyn lahayd qiimaynta hore iyo dib-u-qiimayn kasta.
- Kelmado sheegaya in waalidka lagu ilaalinayo dhowritaanka nidaameed ee lagu sifeeyey buugyarahan;
- Sidii aad ku heli kari lahayd nuqul ogeysiiskan ah buugyaraha dhowritaanka nidaameed; ama sidii loogu soo dari lahaa nuqul ogeysiiskan ah buugyaraha dhowritaanka nidaameed haddii adiga aan mid lagu siinin; **IYO**
- Ilo aad la xiriirto adigu oo kaa kaalmeeya fahamka dhawristan nidaameed.

Tusaalooyin ka mid ah marka aad heli karto ogeysiika qoran ee hore waa:

- Marka ilmahaaga loo garto sabab awgeed ah iyada oo laga shakisan yahay naafonimo inay dhici karto baahi loo qabo waxbarasho gaar ah.
- Markay degmadu rabto inay qiimeyso ama dib-u-qiimeyso ilmahaaga, ama degmadu diideyso inay qiimeyso ama dib-u-qiimeyso ilmahaaga.
- IEP-ga ilmahaaga marka la beddelayo ama meeleynta laga beddelayo.
- Markaad weydiisato beddel oo degmadu ay kuu diideyso inay beddelka kuu sameyso.
- Markaad adigu siiso degmada ogeysiis qoraal ah oo aad adigu ka noqoneyso u oggolaanshaha ilmahaaga inuu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Ogeysiis hore oo qoran waa in lagugu siiyaa macluumaadka luqaddaada hooyo ama hab kale oo lagu wada xiriiro oo adigu aad isticmaasho, oo ay ka midka yihiin luqadda calaamadaha, haddii sidaas in la sameeyo suurtagal ayna ahayn ay iska caddahay mooye.

Haddii luuqadaada hooyo ama habka kale ee wada xiriir aanu ahayn luqad qoran, waa inay degmadu qaaddaa tallaabooyin sidii loo hubin lahaa (1) ogeysiiska in loogu turjumo af ahaan ama qaab kale oo luqaddaada hooyo ah ama hab kale oo wada xiriir, (2) markaad fahansantahay waxa ku jira ogeysiiska, iyo (3) markay jiraan caddayn qoran in waxyaabahan loo baahan yahay in lala kulmay ama la oofiyey.

Luqadda Hooyo
34 CFR §300.29; WAC 392-172A-01120

Luqadda hooyo, marka loo isticmaalo shaqsi leh ku-fiicni Ingiriisiga xaddidan,micnaheedu waa sida soo socota:

1. Luqadda sida caadiga ah u qofkaasi u isticmaalo, ama, markay tahay ilmaha, luqadda sida caadiga ah waalidiinta ilmuhu ay u isticmaalaan;
2. Dhammaanba wixii toos ula-xiriir ah ilmaha (oo ay ku jirto qiimaynta ilmaha) luqadda sida caadiga ah uu u isticmaalo ilmahaagu marka u guriga joogo ama jawiga waxbarasho.

Qofka dhagoolanimada ama indhala'aantu hayso, ama qofka aan luqadda uu ku hadlaa aaney qorneyn, habka kale ee uu dadka kale kula xiriiri karo oo ah midka uu caadi ahaan isticmaalo (sida luqadda ay isticmaalaan dadka aan dhagaha wax ka maqal, farta ay akhriyi karaan dadka aan indhaha wax ka arag (Barille), ama af ahaan wada hadalka).

Waraaqaha Lagu Diro Habka Elektiroonigga ah
34 CFR §300.505; WAC 392-172A-05020

Haddii degmadaadu siiyo waalidka doorasho ah inaad ku heshid dukumentiyada e-mailka, waxaad dooran kartaa inaad ku heshid waxyaabaha soo socda e-mailka:

1. Ogeysiika hore ee qoran;
2. Ogeysiiska dhowritaanka Nidaameed; **IYO**
3. Ogeysiiska la xiriira codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh.

Oggolaansho Waalid – Qeexitaan
34 CFR §300.9; WAC 392-172A-01040

Degmada dugsi waa inay heshaa oggolaanshahaaga qoran ka hor inteyna qiimayn ilmahaaga. Degmadu waa inay waliba heshaa oggolaanshahaaga ka hor inteyna bixin adeegyada waxbarashada gaarka ah markay ugu horreyso ilmahaaga. Waxa jira qaar ka reebban oo ku saabsan helitaanka oggolaanshahaaga oo loogu talagalay qiimeynta.

Oggolaanshaha macnahiisu waa:

1. Adiga in si buuxda afkaaga hooyo laguugu wargaliyey ama qaab kale oo wada xiriir (ee ay ka midka yihiin luqadda calaamadaha, Braille, ama hadalka caadiga ahba) dhammaan macluumaadka ku saabsan waxqabadka adigu oggolaanshaha aad u siineyso;
2. Inaad fahansantahay kuna raacsan tahay tallaabadaasi iyada oo qoraal ah ficilkaas, iyo oggolaansho sifeynaya tallaabadaasi iyo liistooyin ah qoraalka oo diiwaansan (haddii ay jirto) kaasi oo loo siideyn doono iyo qofka ay ku socoto; **Iyo**
3. Inaad fahansantahay in oggolaanshuhu ikhtiyaari ka yahay dhinacaaga oo aad soo ceshan karto (ka noqon karto) oggolaanshahaaga wakhti kasta.

Ka noqoshadaada oggolaanshaha, hase yeeshe, ma burineyso (tirtireyso) ficilkaaga billaabmay kabib markaad bixisay oggolaanshahaaga iyo inta aanad ka noqon.
Tani waxay ka dhigan tahay haddii aad dhiibtay oggolaanshaha ilmahaagu inuu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee horraanta ah oo hadhow aad ka noqoto oggolaanshaha u fasaxaya degmadu inay siiso adeegyada waxbarashada gaarka ah ilmahaaga, degmada dugsi ayaan looga baahanayn inay beddesho diiwaanka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga sidii looga saari lahaa wixii sheegaya inuu ilmahaagu qaato adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Oggolaansho Waalid –Waxyaabaha Looga Baahan Yahay 34 CFR §300.300; WAC 392-172A-03000

Oggolaanshaha Qiimaynta Hore

Degmadaadu ma fulin karto bilowga qiimeynta ilmahaaga si ay go'aamiyaan u qalmitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira illaa inta adiga ay ku siineyso ogeysiis oggolaansho hore oo sifeeyeya hawlaha qiimaynta la soo jeediyey oo ay hesho oggolaanshahaaga adiga oo warqab ah.

Marka aad bixiso oggolaanshahaaga qiimaynta hore, ma aha micnaheedu inaad siineysid oggolaanshaag degmada inay u bilowdo waxbarasho gaar ah iyo adeega la xiriira ilmahaaga. Degmada dugsi ayey waliba ku waajib tahay iney kaa helaan adiga oggolaansho si ay u siiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ilmahaaga wakhtiga ugu horreeysa.

Haddii ilmahaagu uu wax ka barto dugsiyada dowladda ama aad raadineyso inaad qorto dugsiyada dowladda ilmahaaga oo aad diidday inaad bixiso oggolaanshaha ama aanad ka soo jawaabin codsiga oggolaanshaha ee bilowga qiimeynta, laga yaabaa inay degmadaada dugsi sameeyo, laakiin kuma aha waajibaad, inay isku dayaan inay kaa helaan oggolaanshahaaga iyaga oo isticmaalaya dhexdhexaadin ama dhageysi qaabsocod sharci, sida lagu sifeeyey mar dambe ogeysiiskan.

Degmadaadu kuma xadgudbeyso waajibaadkeeda inay soo hesho, ogaato iyo inay qiimeyso ilmahaaga haddii ay doorato inay raadraacdo qiimeynta ilmahaaga xaaladdan.

Xeerka u Gaarka ah ee Qiimaynta Hore ee (Ardayda) Gacanta Ugu Jirta Gobolka

Haddii ilmahaagu gacanta uu ugu jiro gobolka (dowladda) oo uuna adiga kula noolayn, degmadu uma baahana inay kaa hesho oggolaansho inay sameyso qiimeynta hore sidii ay u ogaan lahayd inuu ardaygu u qalmo waxbarashada gaarka haddii:

1. Inkasta oo dadaal macquul ah loo sameeyo, degmadu adiga ay ku weydo;
2. Xuquuqdaada waalid ahaan la joojiyo marka la raaco sharciga gobolka; **AMA**
3. Garsoore u siiyey xaqa inuu sameeyo go'aannada waxbarashada iyo oggolaanshaha bilowga qiimeynta qof kale oon ahayn adiga.

Gacan ugu jirka gobolka (dawladda), sida loogu isticmaaly IDEA, micnaheedu waa ilmaha ah:

1. Ilmaha meel kale lagu koriyo ee aan waalidkiis korniinkiisa lagu meeleyn;
2. Loo qaddariyo inuu ugu jiro gacanta gobolka markay hoos timaad Sharciga Gobolka Washington; **AMA**
3. Markay gacanta ugu jiraan Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Maamulka Carruurta.

Gacan ugu jirka gobolka kuma jiro ilmaha la koriyo ee leh waalid koriya.

Oggolaanshaha Waalidka ee Loogu Talagalay Adeegyada Hore iyo Kala-Nogoshada Oggolaanshaha Sii Socodka Adeegyada

Degmadu waa waajib inay heshaa oggolaanshahaaga warqabka ah ee qoran ama ay sameyso dadaallo macquul ah sidii ay u heli lahayd oggolnshahaaga warqabka ah ee qoran ka hor inteyna bixin adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ilmahaaga markay ugu horreyso.

Haddii aanad ka jawaabin codsiga lagugu soo weydiiyey oggolaanshahaaga inaad bixiso si ilmahaagu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira marka ugu horreysa, ama haddii aad diiddo inaad bixiso ogolaanshahan oo kale, degmadaadu lagama yaabo inay isticmaasho habsocodka dhexdhexaadinta sidii ay iskugu dayi lahayd in la helo oggolaanshahaaga ama la isticmaalo habsocodka dhagesyiga xuquuqda qofka dhowraya sidii loo heli lahaa xukumaad ka timaad garsoore sharci maamuleed in la siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriia ilmahaaga.

Haddii aad diido ama aadan ka jawaabin codsiga lagugu soo weydiiyey oggolaanshahaaga inaad bixiso si ilmahaagu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira marka ugu horreysa, waxa laga yaabaa ineyna degmada dugsi siinin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriia ilmahaaga. Xaaladdan oo kale, degmadaada dugsi ayaan:

1. Ku xadgudbbin ka filitaanka in ilmahaaga loo diyaariyo waxbarasho ku habboon oo dawli bilaash ah (FAPE) sababta oo ah ilmahaaga oo aan la siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; **IYO**
2. loo baahanayn in la yeesho kulan ah barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) ama in loo soo saaro ilmahaaga barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) iyo adeegyada la xiriira ee oggolaanshahaaga laguu weydiistey.

Markaad bixiso oggolaanshahaaga qoran ee ilmahaagu inuu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee degmadu bilowdo inay bixiso adeegyada waxbarashada gaarka ah, ilmahaaga ayaa ku sii jiri doona u qalmitaanka inuu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah illaa:

1. Isaga ama iyada dib-loogu-qiimeeyo oo loo garto ineyna u qalmin adeegyada waxbarashada gaarka ah;
2. Isagu ama iyadu ku qalin jabiyaan dibloomaha dugsiga sare ee caadiga ah;
3. Isagu ama iyadu 21 jir ay noqdaan (ama ilmahaagu noqdo 21 waxa ka dambeeya Ogast 31, isaga ama iyada ayaa ku sii jiri doona u qalmitaanka adeegyada sannad dugsiyeeda waxa ka harsan oo idil.); **ama**
4. Adigu aad siiso degmada ka-noqosho oggolaanshahaaga oo qoran ugu sii waditaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Haddii aad la noqoto oggolaanshahaaga iyada oo qoran in loogu sii wado siinta barnamijyada ka dib markay degmadu bilowday adeegyada waxbarashada gaarka ah, degmadu waa inay kugu siisaa ogeysiis hore oo qoran wakhti macquul ah ka hor inteyna ka joojin adeegyada waxbarashada gaarka ah ilmahaaga. Ogeysiiska hore ee qoran waxa ku jiri doona taariikhda degmadu ka joojin doonto adeegyada ilmahaaga oo waxay kuu wargalin doontaa inay degmada dugsi:

1. Ayna ku xadgudbin ka filitaanka in ilmahaaga loo diyaariyo waxbarasho ku habboon oo dawli bilaash ah (FAPE) sababta oo ah ilmahaaga oo aan la siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; **IYO**
2. Inaan looga baahaneyn inay iskugu wacdo kulan kooxda IEP ama in loo sameeyo IEP ilmahaaga si loogu sii wado siinta adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Degmadu uma isticmaali doonto qaabsocodka sharciga xaqa qofka dhowraya inay kaga dul-baxaan kala-noqoshadaada qoran ama isticmaalka habsocodyada dhexdhexaadinta sidii ay u heli lahayd oggolaanshahaaga sidii ay ugu sii wadi lahayd siinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Kadib markay degmadu joojiso siinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ilmahaaga, looma qaddarinayo ilmahaagu inuu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah markaa waxa ka dambeeya oo wuxuu hoos imanayaa waxyaabaha dhammaan ardayda kale laga filayo. Adiga iyo kuwa kale ee yaqaan ilmahaaga, oo ay ku jiraan degmada dugsiga, ayaa laga yaabaa inayu soo jeediyaan in ilmaha qiimayn hore lagu sameeyo wakhtiyada soo socda.

Oggolaanshaha Waalidka ee Loogu Talagalay Dib-u-Qiimaynta

Haddii baaritaan cusub ay tahay in la sameeyo iyada qayb ka mid ah dib-u-qiimeynta ilmahaaga, degmadu waa inay hesha oggolaanshaaga warqabka ah ka hor inteyna dib-u-qiimeyn ilmahaaga, haddii degmadu ay caddayn karto mooyee:

1. Inay ku kacday tallaabooyin macquul ah si loo helo ogolaanshahaaga dib-u-qiimeynta ilmahaaga; **IYO**
2. Inaadan adigu ka soo jawaabin.

Haddii aad diiddid inaad oggolaatid baaritaan cusub iyada oo qayb ka mid ah dib-u-qiimeynta ilmahaaga, degmada ayaa dhici karta inay ku kacdo, laakiin iyadoon waajib ku ahayn, iney sii wadaan howsha ilmahaaga ee dib-u-qiimeynta iyada oo la isticmaalayo habsocodka dhexdhexaadinta sidii heshiiska loo raadsado, ama la isticmaalo qaabsocodka dhageysiga xuquuq dhowrista si looga dulbaxo diidmadaada inaad oggolaato dib-u-qiimeynta ilmahaaga. Sideedaba qiimeynta hore, degmadaadu kuma xadgudbto waajibaadkeeda hoos yimaad Qeybta B ee Sharciga IDEA haddii ay diiddo sii wadidda dib-u-qiimeynta iyada oo isticmaaleysa dhexdhexaadin ama qaabsocodyada sharci ee nidaamka xuquuq dhowrista leh.

Diiwaangalin Lagu Caddeynayo in la Sameeyey Dadaal Macquul ah oo Lagu Raadinayo Oggolaanshaha Waalidka

Dugsigaagu waa inuu hayaa diiwaangalin qoraal ku caddeynaya in la sameeyey dadaal macquul ah oo lagu raadinayo oggolaanshahaaga ee qiimeynta hore, si loo siiyo waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira ugu horeynta, si dib loogu qiimeeyo iyada oo ay la socoto baaritaan cusub iyo helitaaanka waalidka ilmaha dawladdu gacanta ay ku hayso ee ah bilowga dib u qiimeynta. Diiwaangalinta waa in ay la socotaa qoraal sheegaya iskuday-yada degmada ee arrimahan, ee ay ka midka yihiin:

1. Diiwaan qor faahfaahsan oo ah talefoonnada la wacay ama la isku dayey iyo natiijooyinka wicitaannadaa talefonnada;
2. Koobiyo ah waraaqihii lagu wada xiriirey ee laguu soo direy adiga iyo wixii jawaabo ee la helay; **IYO**
3. Diiwaan-qor faahfaahsan oo ah wixii booqashooyin gurigaaga lagu sameeyey ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Macluumaadka Kale ee Oggolaanshaha

Oggolaanshahaaga looma baahana ka hor inta ayna degmadaadu:

1. Dib u fiirin wixii xog jirta ee ka mid ah qiimeynta ilmahaaga ama dib-u-qiimeynta; **AMA**
2. Ka qaaditaanka baaritaan ilmahaaga ama qiimeynta kale ee laga qaado dhammaanba carruurta haddii, ka hor baaritaankaas ama qiimeyntaas, ay oggolaansho looga baahan yahay dhammaan waalidiinta carruurtaas mooyee.

Degmadaadu lagama yaabo inay u isticmaalaan diidmadaada inaad oggolaansho bixiso adeeg ama hawl kali ah inay kuugu diidaan adiga ama ilmahaaga adeeg, waxtar ama waxqabad kasta oo kale.

Haddii ilmahaaga aad qortay duugsi gaar loo leeyahay oo aad kharashka adigu aad qabto ama aad gurigaaga wax ku bartid, oo aanad bixin oggolaanshaha bilowga qiimeynta ilmahaaga ama dib-u-qiimeynta ilmahaaga, ama aad ku guuldareysato ka soo jawaabidda codsiga bixinta oggolaanshaha, degmadu laga yaabaa ineyna isticmaalin qaabsocodka dhexdhexaadinta si loo helo oggolaanshahaaga ama la isticmaalo qaabsocodka dhageysiga leh xuquuq dhowritaanka sharciyeed si looga dulbaxo diidmadaada. Degmada waliba loogama baahana inay u qaddariso ilmahaagu inuu u qalmo inuu helo adeegyo dugsi gaar loo leeyahay oo cadaalad ku fadhida, oo ah adeegyo loo diyaariyo ardayda waalidku-hayaan ee dhigata dugsiyada gaarka ah ee u qalma waxbarashada gaarka ah.

Qiimaynta Madaxa-Bannaan ee Waxbarashada 34 CFR §300.502; WAC 392-172A-05005

Haddii aaadan ku raacin qiimayn ay dhammays tirtay degmada dugsi, adigu waxaad xuquuq u leedahay in ilmahaaga u qiimeeyo qof aan u shaqeyn degmada dugsi. Mararka qaarkood, degmada waxa laga rabaa inay bixiso qiimeynta (IEE).

Waxaad xuquuq u leedahay inaad u heshid ilmahaaga qiimeynta waxbrashada madaxa-bannaanida ah (IEE) haddii aanad ku raacin qiimeynta ilmahaaga ee ay sameysey degmadaadu. Haddii aad codsato IEE, degmadu waxaa ku waajib ah inay ku siiso macluumaadka ku saabsan halkii aad ka heli lahayd qiimeynta waxbarashada madax-banaanida leh (IEE) iyo waxa ku saabsan shuruudaha IEE-yada.

Qeexitaanno

Qiimayn waxbarasho oo madax-bannaan (IEE) micnaheedu waa qiimayn u qaado imtixaan-qaade khibrad leh oo aan ka shaqayn degmada ka mas'uulka ah waxbarashada ilmahahaaga.

Kharashka dawladduu micnaheedu waa degmada ayaa kharashka qiimaynta oo buuxa bixin ama hubin in qiimeynta hase yeeshe lagugu siiyo kharash iyada oon kugu kicin waxba adiga.

Xaqa Waalidku u Leeyahay Qiimaynta Kharashka Dawladdu Bixiso

Waxaad xaq u leedahay qiimeynta IEE ee ilmahaaga oo loo adeegsado kharashka dawladda, haddii aanad ku raacin qiimeynta ilmahaaga degmadu ku sameysay, iyaga oo ku xiran xaaladaha soo socda:

1. Haddii aad u codsato IEE ilmahaaga kharash dawladeed, degmadaada dugsi waxa ku waajib ah, dhexdeeda 15 maalmo taarikheed laga bilaabo codsigaaga, inay kuwa soo socda midkood ku kacdo: (a) inay xereyso codsi dhageysi qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh in qiimeynta ilmahaagu habboon tahay ama in qiimeynta ilmahaagu aad heshay una la kulmin shuruudaha degmada; **AMA** (b) inaad oggolaato bixinta IEE iyada oo kharashka dawladda leh.

2. Haddii codsiyada degmadaada dugsi ee leh dhageysi qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka go'aanka ugu dambeeya ee qiimeynta ilmahaaga ee degmadu u sameyso tahay mid habboon, adigu wali xaq ayaad u leedahay inaad hesho IEE, laakiin aan ahayn ku helitaanka kharashka dowladda.
3. Haddii aad u codsato IEE ilmahaaga, degmada ayaa dhici karta inay warsato waxa aad uga soo horjeeddo qiimeynta ay sameyso degmadu. Hase ahaate, degmadaadu lagama yaabo inay kaaga baahato faahfaahin ama lagama yaabo iney si aan macquul ahayn ay dib ugu dhigto, midkoodna iney ku siiyaan IEE ee ilmahaaga iyadoo la isticmaayo kharashka dawladda ama buuxiyaan codsi dhageysi qaab-socodka nidaamka xuquuq dhowrka leh si loo difaaco qiimeynta ilmahaaga ee ay sameysey degmadaadu.

Adigu waxaad xaq u leedahay hal IEE oo ilmahaaga la siiyo oo kharashka dowladdu qabto marka kasta oo degmadu sameyso qiimeynta ilmahaaga oo markaa adigu aad diiddan tahay.

Qiimaynta u Waalidka Bilaabay

Haddii aad ugu hesho IEE ilmahaaga kharashka dowladdu bixiso ama aad siiso degmada IEE aad ka heshay iyada oo lagu bixiyey kharash gaar ah.

1. Degmadaadu waa inay qaddarisaa natiijooyinka IEE go'aan kasta oo lagu sameeyo marka loo eego siinta FAPE ee ilmahaaga, haddii ay la kulanto shuruudaha degmada ee loogu talagalay IEE-yada; **IYO**
2. Adiga iyo degmadaada ayaa u siin kara IEE-da caddayn ahaan qaab-socodka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ee ku saabsan ilmahaaga.

Codsiyada Qiimeynta Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ)

Haddii Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) u codsado IEE-ga ilmahaaga qaab-socodka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh, kharashka qiimeyntu waa inay dowladdu bixisaa.

Shuruudaha Degmada Dugsi

Haddii IEE-du tahay kharashka dowladda, shuruudaha hoosteeda lagu helo qiimeynta, oo ay ku jirto goobta qiimeynta iyo khibradda imtixaan qaadaha, waa iney la mid noqotaa shuruudaha degmadu ay u isticmaasho marka ay bilowdo qiimeynta (illaa heerka shuruuduhu ay la lug helayaan xuquuqda aad u leedahay IEE).

Laga reebo sida lagu sifeeyey korka, degmadu ma aha inay ku soo rogto xujooyin ama jadawal la xiriira sidii loo heli lahaa IEE kharashka dowladda.

Ka Qeybqaadashada Waalid
34 CFR §§300.322 iyo 300.501; WAC 392-172A-03100 and 05000

Waxaad xaq u leedahay in lagugu marti qaado kulan ku saabsan baahida waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga.

Waxa lagu siin adiga fursad aad kaga qaybqaadato kulanno ku saabsan baahida waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Tan waxa ka mid ah xuquuqda aad u leedahay inaad ka qaybgasho shirarka sidii looga hadli lahaa macluumaadka ku saabsan u diritaanka ilmahaaga, baahida isagu ama iyadu ay u qabto qiimeynta, u-qalmitaanka ilmahaaga, soo saarka ama dib-ugu-noqoshada IEP, iyo go' aannada meeleynta.

Hase yeeshe, degmoonyinka ayaa dhici karta inay ka hadlaan arrimaha saameynta ku leh barnaamijka ilmahaaga adiga oon arrinta lagugu soo darin. Wada hadalladan waxa ku jira u diyaar-garowga kulanka soo socda ee IEP, qorshooyinka casharka, iyo iskudubbaridka bixinta adeegga. Laakiin, waa in lagugu marti qaadaa inaad ka qaybqaadato kulanno kasta oo khuseysa ilmahaaga ee go'aan lagu gaarayo.

Heshiisyada ka Dhexeeya Adiga iyo Degmadaada ee Khuseeya Kulannada IEP iyo Dib-u-Qiimeynta
34 CFR §§300.303, 300.321, 300.328; WAC 392-172A-03015, 03095 and 03105

Kulanka Heshiisyada IEP

Adiga iyo degmadaada ayaa laga yaabaa inaad ku heshiisaan inaad iska dhaaftaan qaabsocodyada loo baahanyahay qaarkood ee ku saabsan soo saarka IEP-ga ilmahaaga. Adiga iyo degmada ayaa ku heshiin kara:

1. Inaad wax ka beddeshaan ilmahaaga IEP-giisa kulan la'aan kadib markaad adiga iyo degmadu soo saartaan IEP-ga sannadlaha ah. Beddelladan ayaa la samayn karaa iyada oo la soo saaro dukumenti qoran oo kabaya ama beddeleya IEP-ga ilmahaaga halkii dib-loogu-qori lahaa IEP-ga.
   Markaad weydiisato, degmadu waa inay dib u qortaa oo ku siisaa adiga koobi dib loogu noqday oo ah IEP-ga ilmahaaga iyada ooy la socdaan wax ka beddelaadda lagu daray. Haddii wax laga beddelo IEP-gaaga, degmadu waa inay hubisaa in xubin kastaa oo ka mid ah IEP-ga ilmahaaga loo wargaliyo beddeladan.
2. Laga reebo xubin ka tirsan IEP-ga inuuna ka qayb qaadan kulanka IEP-ga, giddi ama qayb ahaan haddii:
   (a) Adiga iyo degmadu ku heshiisaan qoraal ahaan in ka qayb-qaadashada xubinta kooxda IEP aan loo baahanayn sababta oo ah qaybta manhajka xubinta ama adeegyada la xiriira oo aan la beddelayn ama lagaga hadlayn kulanka; **AMA**
   (b) Adiga iyo degmada oo wadajir ku **oggolaada qoraal ahaan** ahaan **ka reebka** ka qab-qaadashada xubinta kooxda IEP aan loo baahanayn sababta oo ah qaybta manhajka xubinta ama adeegyada la xiriira oo la beddelayo ama lagaga hadlayo kulanka. Xaalladdan oo kale markay tahay, xubinta kooxda IEP waa inuu kugu siiyaa, qoraal ahaan kooxda IEP, wax ku darsiga soo saarka IEP-ga ka hor kulanka.
3. In la isticmaalo qaab ka duwan oo lagaga qayb-qaato kooxda IEP iyo kulannada meeleynta kuwaas ay ka midka yihiin ku wada-shirka fiidiyaha iyo isku wicitaannada shirka leh.

Heshiiyada Dib-u-Qiimaynta

Adiga iyo degmada ayaa ku heshiin kara:

1. Inaad iska dhaaftaan u baahanida in la qabto dib-u-qiimeynta ugu yaraan saddexdii sanabaa ah oo sababtu tahay adiga iyo degmada oo ku heshiiyey inaan loo baahanayn.
2. In dib loo qiimeeyo ilmahaaga wax ka badan hal jeer sannadkii.

Foomka Ka-Noqoshada Heshiiyada

Ka noqoshada heshiiska ma burin (tirtiri) karto ficilka la qabtay marka heshiisku jiray. Weydiisgia in laga noqdo heshiis waa inuu noqdaa mid qoraal ah.

Ka Wareegga Xuquuqda Waalidnimo Da'da Qaan-Gaarka 34 CFR §300.520; WAC 392-172A-05135

Markuu ilmahaagu noqdo 18 jir, isaga ama iyada ayaa loo qaadanayaa inuu gaaray da'da qaan-gaarka. Kuwan waxa ka mid ah kuwa ku jira goobaha asluubta iyo goobaha xiritaanka da'-yarta."Da'da qaan-gaarku" micnaheedu waa ilmahaaga oo loola dhaqmo sida qaan-gaarka iyo dhammaan xuquuqaha hoos yimaad IDEA ee kaa soo wareega adiga oo ku soo wareega ilmahaaga. Waxa kale oo jira dhacdooyin hoos yimaad sharciga gobolka oo marka u ilmahaaga loola dhaqamo sidii isagu ama iyadu ay gaareen da'da qaan-gaarka ah ka hor inteyna noqon 18 jir. Tusaalooyin ka mid ah kuwan waxa ah marka ay maxkamadduu amarto xorowga iyo guurka.

Haddii ilmahaaga loo go'aamiyo inuuna karti u lahayn samaynta go' aannada waxbarasho, ee xuquuqaha hoos yimaad IDEA ayaan ku wareegeyn ilmaha. Xaaladdan oo kale mas'uulka sharciga ah ama wakiilka ayaa u samayn go'aannada waxbarasho.
Laga bilaabo hal sano ka hor inta u ilmahaagu gaarin 18 jir, IEP-ga waa inay ku jiraan kelmado sheegaya in dhammaan xuquuqaha hoos yimaad IDEA lagu wareejiyo isaga ama iyada markay gaaraan 18 jirka. Markuu ilmahaagu gaaro da'da qaan-gaarka, ogeysiinta wareejinta xuquuqda ayaa la idin siin doonaa labadiinaba adiga iyo ilmahaagaba. Ogeysiimo kasta oo kale ee hoos yimaad Qybta B ayaa la idin siin doonaa labadiinaba.

Xogdhowrka Macluumaadka

Qaybta B ee IDEA ayaa adiga kugu siisa xuquuq ku saabsan diiwaannada waxbarashada gaaarka ah ee ilmahaaga. Xuquudan ayaa marka lagu daro xuquuqaha aad leedahay ee hoos yimaad Sharciga Xogdhowrka iyo Xuquuqaha Waxbarashada Qoyska (FERPA) oo ah sharci u bixiya dhammaan ilaalinta diiwaannada waxbarashada.

Qeexitaanno
34 CFR §300.611; WAC 392-172A-05180

Sida lagu isticmaalay cinwaanka **Xogdhowrka Macluumaadka:**

- *Burburin* micneheedu waa sheyga burburintiisa ama ka qaadka wixii lagu garan lahaa shaqsiga dabadeed si macluumaadku ay noqdaan kuwo aan shaqsi ahaan qofka aan lagu garan.
- *Diiwaannada Wabarasho* micnaheedu waa nooca diiwaannada lagu sheegey hoosta qeexitaanka “diiwaannada waxbarasho” ee ku jira 34 CFR Qaybta 99 (Xeerarka Meelmarinta Xuquuqaha Waxbarashada Qoys iyo Sharciga Xogdhowrka 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
- *Haya’dda Ka Qayb-Qaadanaysa* macnaheedu waa haya’d ama machad kasta oo ururiya, haya, ama isticmaala macluumaad shaqsi ahaan la garan karo, ama laga helo macluumaad iyadoo la raacayo qaybta B ama IDEA. (Maadama dukumentigan u ku nuuxnuuxsanayo ka qaybgalkaaga degmadaada dugsi ee maxalliga ah, ereyga “degmo dugsi” ayaa loo isticmaali qaybtan.)

Shaqi Ahaan Loo Garan Karo
34 CFR §300.32; WAC 392-172A-01140

Qofka waxa shaqsi ahaan lagu garan karo macneheedu waa macluumaad ay la socoto:

(a) Magaca ilmahaaga, magacaaga waalid ahaan, ama magaca qof kale oo xubin qoys ah;
(b) Cinwaanka ilmahaaga;
(c) Aqoonsi shaqsi ahaan lagu garan karo, sida lambarka sooshal sekuuritiga ama lambarka ardaynimo; **AMA**
d) Liis astaamo shaqsi ahaan ama macluumaad kale oo suurto galeneysa in lagu garto ilmahaaga oo si hubaal ahaan ah macquul u ah

Ogeysiiska Waalidiinta
34 CFR §300.612; WAC 392-172A-05185

OSPI waxay bixisaa ogeysiis, iyada u mareysa xeerarkeeda, sidii si buuxda adiga laguugu wargalin lahaa arrimaha ku saabsan macluumaadka shaqsi ahaan lagu garan karo qofka, oo ay ka midka yihiin:

1. Sifeynta isku jirta illaa xadka lagu bixiyey ogeysiiska oo loogu gudbiyey luqadahooda hooyo kooxaha kala dudwan ee ku nool Washington;
2. Sifeynta carruurta laga hayo macluumaadka la garan karo, nooca macluumaadka la raadinayo, habka Washington ugu talagashay inay u isticmaasho ururinta macluumaadka (marka lagu daro ilmaha macluumaadka laga soo urruriyey) iyo siyaabaha loo isticmaali doono macluumaadka;
3. Soo koobitaan ah ujeddooyinka iyo habsocodyada degmooyinka waajibadka ku ah iney raacaan marka la eego keydinta, daah uga ka qaadka kooxaha saddexaad, haynta iyo bururinta macluumaadka shaqsi ee la garan karo; **IYO**

4. Sifeyn ah dhammaanba xuquuqda ay waalidiinta iyo ardaydu leeyihiin marka loo eego macluumaadkan, marka lagu daro xuquuqda hoos timaad Sharciga Xogdhowrka iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA) iyo xeerarka fulinteeda ah ee 34 CFR Qaybta 99.

Ka hor inta aan lagu kicin hawlo aqoonsi gobolka-oo-dhan ah, soo helitaan ama qiimeyn (taasi waliba waxa loo yaqaan "helidda ilmaha") ogeysiisku waa waajib in lagu daabaco wargeysyada ama laga sheego warbaahinta kale, ama labadoodaba, taasi oo dhammaanba si buuxda loo wargalinaayo waalidinta Gobolka oo dhan, si loo helo, loo garto, iyo loo qiimeeyo carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira.

Xuquuqda Marin-u-Helka
34 CFR §300.613-617; WAC 392-172A-05190–05210

Adigu waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso oo aad dib u eegto diiwaannada waxbarasho ee ilmahaaga ee la ururiyey, la hayo ama loo isticmaalo degmada dugsi ee hoos timaad Qaybta B ee IDEA. Degmadu waa inay u hooggaansanaato codsiga inaad fiiriso oo dib u eegto wixii diiwaanno ah ee ilmahaaga laga hayo, oo aan lagugu daahin si aan loo baahanayn iyo ka hor kulan kasa oo ku saabsan IEP, ama qaabsocod dhageysi nidaam xuquuq dhowris sharci leh oo cadaalad ah (oo ay ku jirto kulanka go'aaminta ama dhageysi ku saabsan edbinta) iyo xaallad kama dambeystu tahay 45 maalmood ka dib markaad codsiga sameysay.

Xaqa aad u leedahay inaad fiiriso ama dib aad u eegto diiwaannada waxbarashada wax ka mid ah:

1. Xaqa aad u leedahay inaad ka hesho jawaab degmada dugsi waxa ku saabasan weydiiskagaa macquulka ah oo ku saabsan faahfaahinta iyo micneynta diiwaannada;
2. Xuquuqda aad u leedahay inaad ka codsato degmada dugsi inay ku siiso nuqullada diiwaanka haddii si wax ku ool leh aadan u fiirin oo dib u eegin diiwaannada haddii aad hesho nuqullada mooyee; **IYO**
3. Xaqa aad u leedahay inaad yeelato inuu wakiilkaagu fiiriyo oo u dib u eegto diiwaanada.

Degmada ayaa u qaadan inaad awood u leedahay si aad u fiiirso oo dib ugu noqoto diiwaannada la xiriira ilmahaaga haddii lagugula taliyo inaad haysan awood hoos timaad sharciyada gobolka ee xukuma arrimaha ay ka mid yihiin kala-tagga, iyo is-furka.

Diiwaanka Marin-u-Helkiisa

Dugsi degmo kasta waa inay haysaa diiwaannada kooxo kasta oo marin u hela diiwaannada waxbarashada la ururiyey, la hayo, ama la isticmaalo markay oos timaad IDEA, oo ay ku jirto magaca kooxda, taariikhda marinka loo siiyey, iyo ujeeddada kooxda awoodda loo siiyey inay isticmaalaaan diiwaannada. Degmoonyinka dugsi loogama baahana inay hayaan marinka diiwaankan ee loogu talagalay waalidiinta iyo shaqaalaha degmada dugsi ee awoodda loo siiyey.

Diiwaannada Laga Hayo Halka Ilmaha ah Waxa ka badan

Haddii mid ka mid ah diiwaannada waxbarashada uu ka mid yahay macluumaad hal arday wax ka badan, waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso oo aad dib u eegto kaliya macluumaadka la xiriira ilmahaaga ama in lagu ogeysiiyo macluumaadkaa haddii degmada ayna ku tusi karin adiga iyada oo aan siideyn macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ee ku saabsan arday kale.

Liiska Noocaca iyo Goobaha Macluumaadka

Haddii aad Codsato, dugsiga deegaanku waa inuu ku tustaa liis muujinaya noocyada iyo diiwaanka goobaha waxbarasho laga soo qaaday, hayey ama ay degmada dugsi isticmaashay.

Ajuurada (Fees)

Waxaa laga yaabaa in degmadu ay kugu dallacdo ujro nuqullada diiwaanka laguugu sameeyey markay hoos timaad Qaybta B ee IDEA, haddii lacagta la iska qaadayaa aaney kaa joojineynin adiga inaad isticmaasho xuquuqdaada awoodeed ee aad ku aragto diiwaanka oo aad dub-ugu-eegto waxayaabaha ku qoran. Waxa laga yaabaa in aaney ka qaadin wax ujro ah raadinta ama-dib u-eegida markay hoos timaad IDEA.

Sixidda Waxa Diiwaanka ku Qoran Markuu Codsado 34 CFR §300.618 – §300.621; WAC 392-172A-05125

Haddi aad aamminsantahay in macluumaadka diiwaanka waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga lagu aururiyey, lagu hayo, ama lagu isticmaalo markay hoos timaad IDEA ay tahay khalad ama wax habaabin leh, ama wax ku xadgudbaya asturnaanta shaqsiga ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga, waxaad weydiisan kartaa inay degmadu saxdo macluumaadka.
Degmadu waa inay go'aansato sixitaanka macluumaadka sida codsigaagu yahay, gudaheed wakhti muddo macquul ah marka la helo codsigaaaga.

Fursad La isku Siiyo Dhageysi Iyo Natiijooyinka Dhageysiga

Haddii ay degmadu diiddo inay beddesho macaluumaadka iyada oo raacaysa codsigaaga, waa inay kuu sheegtaa adiga go'aankaas oo kuu tilmaantaa xuquuqda aad u leedahay dhageysi ay kuu qabato degmadu.

Adigu waxaad xaq u leedahay inaad hesho dhagesyi aad ka hortimaad macluumaadka ku qoran diiwaanka waxbarashada ilmahaaga sidii aad u hubin lahayd inayna noqon kuwo aan sax ahayn, aan habaabis lahayn ama xadgudub ku ah asturnaanta shaqsi ama xuquuqaha kale ilmahaaga. Dhageysiga ka-horimaadka macluumaadka ku qoran diiwaanka waxbarashada ayaa ah waajib inuu ahaado mid u hoggaansan qaabsocodka dhageysiga degmada ee hoos timaad FERPA. Tani ma aha dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka ee waxbarashada gaarka ah.

Haddii dagmadu go'aamiso in macluumaadku khalad yihiin, habaabis yihiin, ama haddii kale ay ku xadgudbayaan asturnaanta shaqsi ee ilmaha, waa inay beddeshaa macluumaadka awgeed sababtaas oo ay kuugu wargalisaa beddeladaas qoraal ahaan.

Haddii dagmadu go'aamiso in macluumaadku khalad yihiin, habaabis, ama haddii kale ku xadgudbayaan asturnaanta shaqsi ahaan ilmaha, waa inay kuu wargalisaa inaad u leedahay xuquuq kudarka diiwaanka waxbarasho ee ilmahaaga kelmado ka faallooyinka macluumaadka ama bixinaya sababaha aad ku diiddantahay go'aanka degmada.

Haddii aad doorato inaad dhex dhigto kelmado diiwaanka ilmahaaga waa inay:

1. Hayso degmadu qayb ahaan diiwaannada ilmahaaga illaa inta diiwaanku ama qaybta la isku haysto la hayo; **IYO**
2. Haddii degmadu ay daah uga qaaddo diiwaanka ilmahaaga ama qaybta la isku diiddan yahay dhinac kasta ha ahaadeene, kelmadaha waa in daaha looga qaadaa waliba dhinacaas.

Oggolaansho Daah-uga-Qaadka macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Karo
34 CFR §300.622; WAC 392-172A-05225

Waa in la helo oggolaanshahaaga oo qoran ka hor intaan daaha looga qaadin kuwa kale macluumaadka shaqsiga lagu garan karo haddii daah uga qaadku macluumaadka ku jira diiwaannada waxbarashada ilmahaaga loo oggolaado la'aanteed oggolaanshaha waalid iyada hoos timaad FERPA. Guud ahaan, oggolaanshahaaga ma aha mid loo baahan yahay ka hor marka qofka waxyaabaha qof ahaan lagu garan karo loo gudbiyo mas'uulliyadda hay'daha ka qeybqaatayaasha ah ujeeddada oo ah iney waafaqdo waxyaabaha looga baahan yahay ee Qeybta B ee IDEA. Hase yeeshe, oggolaanshahaaga waa in la helaa kahor inta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo aan loo sii deyn haya'daha ka qayb-qaatayaasha ah ee dhiibaya ama bixinaya adeegyada ku-meelgaarka ah. Intaa waxa u dheer, haddii ilmahaagu uu dhigto dugsi gaar loo leeyahay, waa waajib in la helo oggolaanshahaaga ka hor inta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ee ilmahagaaga aan loo sii deyn mas'uuliyiinta degmada ee u

ku yaallo dugsiga gaarka loo leeyahay iyo mas'uuliyiinta degmada uu ilmahaagu deggan yahay haddii aadan adigu u qorsheysan inaad qorto ilmahaaga degmada dugsi u degganyahay.

Dhowritaannada macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Karo 34 CFR §300.623; WAC 392-172A-05230

Degmadaada dugsi waa inay ilaalisaa macluumaadka shaqsiga lagu garan karo xog-dhowrkooda markay yihiin heerarka ururinta, keydinta, daah ka qaadka iyo burburintoodaba. Hal sarkaal oo jooga degmada dugsig waa inuu qaadaa masuuliyadda hubinta xog-dhowrsanaanta mid kasta oo ka mid ah macluumaadka shaqsiga lagu garan karo. Dhammaan dadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka waa inay helaan tababbar ama tilmaamid marka loo eego xog-dhowritaanka hoos yimaad Qaybta B ee IDEA iyo FERPA iyo Qaabsocodyada Gobolka Washington.

Degmo Dugsi kasta waa inay haystaa, sidii dadweynuhu u fiirin lahaayeen, liistada magacyada iyo darajooyinkooda shaqaalahaas ka midka ah haya'dda ee laga yaabo inay marin u leeyihiin helitaanka macluumaadka shaqsiga lagu garan karo.

Burburinta, Haysiga iyo Keydinta Macluumaadka 34 CFR §300.624; WAC 392-172A-05235

Dugsiga degmadaadu waa inay ku ogeysiisaa marka macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ee la ururiyey, la hayey am la isticmaalay aan loogu baahanayn in loogu sii wado siinta adeegyada waxbarasho ilmahaaga.

Markay baahideedu dhammaato, macluumaadka waa in lagu burburiyaa codsigaaga. Hase yeeshe, diiwaan joogto ah oo ilmahaaga magaciisa/eeda, ciwaanka iyo lambarka taleefanka, derajadiisa/deeda fasal, diiwaanka ka-qaybgal dugsi, xiisadaha la qaatay, heerka darajada fasal la dhameeyay iyo sannadka la dhameeyay ayaa laga yaabaa in la hayo iyada oo aan xad wakhti lahayn.

Sharciga gobolka uga yaal haynta diiwaannada ayaa ku jira Xeerka RCW Cutubka 40. 14. Qaab-socdka dhererka muddada ay degmadu haysaneyso diiwaannada ayey daabacdaa Xoghaynta Gobolka Washington, Qaybta arkeefiyada iyo Maamulka Diiwaannada.

Qaabsocodyada Xallinta Khilaafka Waxbarashada Gaarka ah

Adigu waxaad tahay ka qaybqaate muhiim u ah dhammaan dhinac kasta oo ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Ka qayb-qaadashadani waxay bilaabantaa u-diritaanka hore ee ilmahaaga. Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI ayaa had iyo jeer ku dhiirri-galisa waalidiinta iyo degmooyinku inay ka wada shaqeeyaan inay isku dayaan sidii ay u xallin lahaayeen is-afgarashawaaga saameynta ku leh barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ardayga. Markaad adiga iyo

degmadaada dugsi aad xallin kari weydaan isafgaranshawaaga, waxa jira kala dooroshooyinka rasmiga ah ee lagu xalliyo khilaafaadka. Kuwani waxay kala yihiin dhexdhexaadinta, cabasho muwaaddin, iyo dhageysiyada nidaamka xuquuq dhowrka leh.

Dhexdhexaadin
34 CFR § 300.506; WAC 392-172A-05060–05075

Adiga (iyo degmada) ayaa laga yaabe inaad weydiisataan dhexdhexaadin in lagu xalliyo khilaafka ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ee ilmahaaga. Adiga (iyo degmada) ayaa lagaa yaabaa inaad diiddaan inaad ka qaybqaadataan dhexdhexaadinta.

Guud Ahaan

Adeegyada dhexdhexaadinta ayaad adigu heli kartaa iyada oo aan wax kharash kugu kicin ama degmada ayaa kaa caawin sidii loo xallin lahaa dhibaatooyinka la xiriira aqoonsiga, qiimaynta, meeleynta caafimaad, iyo siinta FAPE ilmahaaga marka kasta oo la codsado dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh. Dhexdhexaadintu waa ikhtiyaari oo looma isticmaali karo in lagugu diido ama dib loogu dhigo xuquuqdaada dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh uu ku siiyey Qaybta B ee IDEA.

Marka heshiis ka dhexeeya adiga iyo degmada la gaaro, waa in qoraal heshiis dhexdhexaadin ah oo aad saxiixdaan adiga iyo iyo wakiilka degmada ee awoodda loo siiyey inuu galo heshiiyada sharci ahaan qabashada leh. Dhammaanba wada xaajoodka laga wada hadlo muddada dhexdhexaadinta waa kuwo xogdhowr leh oo aan loo isticmaali karin caddayn ahaan qaabsocodka sahrci ee nidaamka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ama tallaabo madani ah oo ka socota Maxkamad Fedeeraal ah ama maxkamadda Gobolka Washington. Tan waan in lagu sheegaa heshiiska qoran. Hase yeeshee, heshiiska dhexdhexaadinta kaligeed ayaa loo isticmaali karaa caddayn ahaan. Heshiisyada dhexdhexaadintu waa sharci ahaan qabasho leh oo markaa meelmarin ku leh gobol kasta iyo maxkamad kasta oo khibrad ku leh arrinta ama maxkamad degmo oo ka tirsan Mareykanka (Gobolada Mideysan).

Dugsiga ayaa soo saari kara qaabsocodyo u fidiya waalidiinta doorta ineyna isticmaalin nidaamka dhexdhexaadinta, fursad in la wada kulmo, wakhti iyo goob adiga kuu habboon, iyada oo kulanka ay ka qaybgalaan koox dhinacnna aan u eexan:

1. Oo qandaraas kula jirta koox ka duwan oo ku habboon arrinta u qaabbilsanna xallinta khilaafka, ama xarunta macluumaadka iyo tababbarka waalidka ama xarunta kheyraadka waalidka beesha ee gobolka; **IYO**
2. Qofkaas oo kuu sharixi doona faa'iidooyinka habka dhexdhexaadinta ay leedahay iyo waxa uuna kugu dhiirigelin doonaa inaad isticmaasho nidaamka dhexdhexaadinta.

Eex-la'aanta Dhexdhexaadiyaha

Dhexdhexaadinta waxa sameeya shaqsi u qalma, oo cidna aan u eexan, laguna tababbaray qaabab dhexdhexaadin wax ku ool leh. Shaqsigu waa inuu waliba noqdaa qof aqoon u leh sharciga iyo qawaaniinta la xiriirta siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la halmaala. OSPI waxay qandraas la qaadataa haya'd ka baxsan iyada inay u sameyso dhexdhexaadinmaha. Haya'ddaas ayaa haysa liiska dhedhexaadiyeyaasha. Dhexdhexaadintu waxa loo asteeyaa si filiqsan, kaayesi leh, ama ku dhisan eex-la'aan kale. Dhexdhexaadiyuhu (1) ma aha inuu noqdo shaqaale ka tirsan OSPI, degmada ama haya'd kale oo ka socota gobolka oo si toos ah u siineysa adeegyada ilmaha arrintiisu qaabsocodka dhexdhexaadintiisu u socoto, iyo (2) ma aha inuu u lahaado dano ama khilaaf shaqsi ama xirfad ahaan Dhexdhexaadinta waxa loo jadwalin qaab wakhti ku tiirsan oo lagu qaban doonaa goob kuu sahlan adiga iyo degmadaba.

Faraqa u Dhexeeya Dhageysiyada Qaabsocodka Nidaamka xuquuq dhowrka leh iyo Baaritaannada Cabashada Muwaaddin ee Waxbarashada Gaarka ah

Dhexdhexaadinta waxa dheer, inaad adigu xaq u leedahay inaad isticmaasho nidaamka cabashada ee gobolka ama aad weydiisato qaabsocodka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh si aad ugu xalliso khilaafyada lala leeyahay degmada dugsi. Qaybta B ee IDEA, iyo xeerarka gobolka iyo dowladda federaalka ayaa leh qaabsocodyo kala duwan oo ku wajahan cabashooyinka muwaaddin ee waxbarashada gaarka ah iyo dhageysiyada qaabsocoyada nidaamka xuquuq dhowrka leh.

Cabashooyinka muwaaddin ee waxbarashada gaarka ah ayuu lagu xereyn karaa OSPI shaqsi kasta oo ku eedeynya in degmo, OSPI, adeeg waxbarasho degmo, ama haya'd dawladeed oo kale oo ku xadgudtay Qaybta B waxyaabaha looga baahan yahay, xeerarka ku jira 34 CFGR Qaybta 300, xeerarka gobolka ee ku jira Cutubka 392-172A WAC. Cabshooyinka muwaaddinka waxa baara OSPI, iyada oo ku saleysan macluumaadka ku saabasan xadgudubyada u soo gudbiyey qofka xereynaya cabashada, iyo degmada dugsi, ama haya'dda ka jawaabeysa cabashada. Cabashada muwaadinka waa in lagu xereeyaa hal sano gudaheed laga bilaabo markay dhacday xadgudbka la sheeganayo.

Codsiyada dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa ah kaliya inaad adigu xereyso ama degmada dugsi arrin kasta oo ku lug leh soo jeedinta ama diiditaanka sidii loo bilaabi lahaa ama loo beddeli lahaa garashada, qiimeynta, ama meeleynta waxbarasho ee ilmahaaga ama siinta ilmahaaga waxbarasho dawladeed oo habboon oo bilaash ah (FAPE). Dhageysiyada nidaamka xuquuq dhowrka leh waxa qaban doona ALJ (Garsoore Sharci Maamuleed) oo shaqaale u ah Xafiis Maamuleedka Dhageysiga, oo ah haya'd madax-bannaan. Dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa waxa ka mid ah markhaatiyo iyo dhiibitaanka caddaynta. Codsiyada nidaamka xuquuq dhowrka leh waa lagu xereeyaa labo sano gudahood marka

xadgudbka la sheeganayaa dhaceen (mararka qaarkood la reeebo been abuurka iyo macluumaadka oo la qariyo.)

Jadwallada iyo qabsocodyada loogu talagalay cabasho muwaaddin, iyo dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa hoosta lagu faahafaahinaya.

Qaabsocodyada Cabashada Muwaaddinka
34 CFR §§300.151 – 300.153; WAC 392-172A-05025–05045

Adigu waxaad xaq u leedahay inaad ku xereyso OSPI cabashada waxbarashada gaarka. Cabashadaada waa in la saxiixaa oo ay wadato macluumaadka gaar ah. Cabashadaada waa in lagu gudbiyaa hal sano gudaheed laga bilaabo markay dhacday xadgudbka la sheeganayo.

Haddii adiga, shaqsi kasta, ama urur, aamminsan yihiin inay degmo, OSPI, ama qolo waxbarasho oo kale, ay xukuntana IDEA ay ku xadgudbeen QAYBTA B ee IDEA, xeerarka meelmarinaya Qaybta B, ama u-dhigma xeerarka gobolka, ayaa ku xireyn kartaa the Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI), Special Education, PO Box 47200, Olympia, WA 98504-7200. Waa inaad siisaa nuqul ah cabashada degmada ama haya'd kale oo adigu aad ka cabaneyso.

Xereynta Cabashada

Cabashada waa in la saxiixaa oo ay wadato macluumaadka soo socda:

- Kelmado sheegaya in degmadu ama haya'd kale ku xadgudubtay waxyaabaha looga baahanyahay Qaybta B ee IDEA, xeerarka meelmariya Qaybta B, sharciga gobolka ee u dhigma ama xeerarka, ama kelmado sheegaya in degmadu ama haya'd kale ayna meelmarin dhexdhexaadinta ama xallinta heshiiska;
- Magaca iyo cinwaanka degmada ama haya'dda kale;
- Magaca ardayga, haddii cabashadu u gaar tahay ardayga, iyo macluumaadka lagula xiriiryo ardayga guri-la'aantu hayso;
- Sifeynta dhibaatada oo ay la socdaan xaqiiqooyin la taaban karo.
- Xallinta la soo jeediyey ee dhibaatada illaa inta la garanayo macluumaadkan ee aad heli karto adigu wakhtiga aad xereyso cabashada; **IYO**
- Magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga taleefan.

OSPI ayaa soo saartay foom aad dooran karto oo adigu aad u isticmaali karto sidii aad u xereyn lahayd cabashada. Foomkan waxa laga heli karaa barta internetka OSPI ee waxbarashada gaarka ah.

Xadgudubku waa inuuna dhicin waxaan ka badnayn hal sano ka hor taariikhda cabashada la helay.

Baaritaanka Cabashooyinka

Haddii aad xereysid cabasho saxiixan oo qoran, OSPI waa inay baartaa oo ay ku soo saartaa go'aan gudaheeda 60 maalmo taariikheed haddii wakhti kordhin la aqbalo mooyee. Muddada 60 maalmood, OSPI (1) ayaa u baahan degmadu inay kaa siiso jawaab cabashadaada; (2) siiso qofka cabanaya fursad u ku dhiibo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan eedeymaha ku jira cabashada; (3) waxa laga yaabaa inay ku kacdo baaritaan goobta ah oo madax-bannaan, haddii OSPI garato in loo baahan yahay; iyo (4) dib-u-fiirisaa dhammaan macluumaadka khuseeya arrinta, waxayna sameyn go'aamin madax-bannaan oo ah inay degmadu ama haya'd kale ay ku xadgudbeyso waxa looga baahan yahay Qaybta B ee IDEA.

Baaritaanka, U-Dheereynta, Go'aanka Qoran

60ka maalmo taariikheed ee muddada xadka ah aya la kordhin karaa haddii: (1) xaaalado gaar ahi ay jiraan marka loo eego cabasho gaar ah; **AMA** (2) adiga iyo degmada dugsi arrinta ku jirta oo si ikhtiyaar ah ugu heshiiya qoraal ahaan inaad kordhisaan muddada lagu xallin lahaa cabashada dhexdhexaadin.
Go'aanka oo qoran ayaa loo diri qofka xereynaya cabashada iyo degmada dugsi. Go'aanka qoran ayaa wax ka qabanaya eedeyn kasta. Eedeyn kasta go'aanka qorani wuxuu sheegi doonaa natiijooyinka xaqiiqada, gabagabooyinka, sababaha loo qaaday go'aanka, iyo tallaabooyinka sixitaanka macquulka ah ee loo gartay in looga baahan yahay inay xalliso cabashada haddii xadgudub dhacay.

Xallinta Cabashada

Markay OSPI hesho xadgudub ama dib–uga-dhac inay bixiso adeegyada habboon ee loo maro nidaamaka cabashada, go'aanka ayaa wax ka qabanaya:

1. Sidii dib-ugu-dhexdhexaadin ay ugu sameyn lahayd u diidka adeegyadaas, oo ay ku jiraan, kolba sidey ku habboon tahay, siinta lacag ucelin ama ficil kale oo ku habboon oo arrinta loogu saxayo baahida ardayga; **IYO**

2. Siinta adeegyada habboon waxbarashada gaarka mustaqbalka dhammaan ardayda.

Cabashooyinka Muwaaddin ee Waxbarashada Gaarka ah iyo Dhageysiyada nidaamka xuquuq dhowrka leh

Haddii cabasho qoran la helo oo iyaduna ah mawduuc ahaan hadda lagu qaabsocodsiinayo nidaam dhageysi, ama cabashadu sidato arrimo badan, oo hal ama qayb ka badan oo arrimahoodu qayb ka yihiin dhageysiga, OSPI waa inay arrintaa gooni u dhigaan (aan la baarin) qayb kasta oo ka mid ah cabashada lagu xallinayo nidaamka xuuquq dhowrka dhageysiga illaa inta dhageysiga la dhammeynayo. Arrin kasta oo cabashada ka mid ah ee aan ku jirin ficilka qaabsocoa nidaamka xuquuq dhowrka waa in lagu xalliyo muddada loo qabto xallinta xabashada gudaheeda.
Haddii arrin la soo saaro ku saabsan cabasho horey go'aankeeda loogu gaaray qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka dhageysiga kaasi oo ka dhexeeya labada

kooxood ee hore wax u dhex mareen, go'aanka dhageysiga ayaa qabasho leh oo markaa OSPI waa waajib inay u wargaliso qofka cabanaya inayna baaris ku samayneyn arrintaas.

OSPI waa iay xallisaa cabashada ku eedeyneysa in degmadu ka gaabisey inay meelmariso go'aanka nidaamka xuquuq dhowrka leh .

Qaabsocodka Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka leh 34 CFR §§300.507 – 300.513; WAC 392-172A-05080–05125

Adiga (iyo degmada) ayaa laga yaabaa inaad codsataan dhexdhexaadin in lagu xalliyo khilaafka ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ee ilmahaaga. Fadlan ku soo dar macluumaadkaas codsigaaga dhageysi. Jadwalka lagu buuxinayo codsi nidaamka xuquuq dhowrka leh waa labo sano (iyaga oo ay jiraan qaar ka reebban.)

Guud Ahaan

Adiga ama degmada dugsi ayaa dhici karta inaad fayl gareysan codsi dhageysi xuquuq dhowris leh wax kasta oo la xiriirta: Soo jeedin ama diidmo in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada ilmahaaga ama siinta ilmahaaga waxbarashada bilaashka ah ee ugu habboon ee dawaladda (FAPE). Degmadu waa inay kuu wargalisaa adiga haddii ay jiraan adeeg sharci bilaash ah ama jaban iyo adeegyada la halmaala ee laga heli karo agagaarka marka dhageysi nidaam xuquuq dhowr leh la xereeyo ama mararka kale, haddii aad codsato macluumaadka. Markay tahay qaabsocodyada dhageysiga nidaamka xuquuq dhoqrista leh "adiga", waxa ku jira qareenkaaga haddad mid qabsatay, iyo "degmada" waxa ka mid ah qareenka degmada haddii u wakiil ka yahay qareen.

Xereynta

Si aad codsato dhageysi, adiga ama degmadu waa inaad soo gudbisaan codsi dhageysi nidaam xuquuq dhowris leh u leh dhinca kale. Codsigaasi waa inuu wataa dhammaan waxyaabaha hoosta ku yaal oo in xog-dhowris yeeshaa.

Adiga ama degmadu, dhinacii kasta ee gudbinta sameeyayba, waa inay waliba OSPI siiyaan qaybteeda Adeegyada Kheyraadka Maamuleed nuqul ah codsiga dhageysiga cinwaankan soo socda:

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
Adeegyada Kheyraadka Maamuleed
Administrative Resource Services
Old Capitol Building
PO Box 47200
Olympia, WA 98504-7200
Fax: 360-753-4201

Codsiga Dhageysiga Xuquuq Dhowrka leh waa inay ku jiraan:

1. Magaca ardayga;
2. Cinwaanka ardaygu meesha u ku noolyahay;
3. Magaca dugsiga ardayga;
4. Haddii u ardaygu ilmo ama dhallin bilaa guri u yahay, ilmaha macluumaadka lagula xiriirayo;
5. Sifeynta nooca dhibaatada, oo ay ku jirto xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; **IYO**
6. Xallinta la soo jeediyey ee dhibaatada illaa inta la garanayo ee aad heli karto adigu ama degmadu heli karto wakhtigaas.

Ogeysiiska loo Baahan Yahay Ka hor Codsiga Dhageysiga Xuquuq Dhowrista Sharci leh

Waxa laga yaabaa in adiga iyo degmadu aydaan yeelan codsiga dhageysiga nadaamka xuquuq dhowrista leh illaa degmadu ay la xereyneyso codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh dhinca kale oo ay siiso OSPI codsiga nuqulkiisa oo wata macluumaadka korka isku daba taxan.

Kaafinimada Codsiga Dhageysiga

Si horay ay ugu socon lahayd codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh , waa in loo qaddariyaa inay kaafi tahay (Ku filnnaan leedahay). *Kaafi* micnaheedu waa codsiga oo la kulma waxyaabaha looga baahan yahay arrinta ee korka ku qoran hoosta Xereynta. Codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh yaa loo qaddarin inuu yahay kaafi haddii mooye dhinca helay codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ugu wargaliso garsoore maamul sharciyeed (ALJ) iyo dhinca kale qoraal ahaan, gudahood 15 maalmo taariikheed, in dhinaca helay ay aamminsan yihiin in codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh uunan kaafi ahayn.

Gudahooda shan maalmo taariikheed marka la helo u wargalinta kaafi-la'aanta, garsoore maamul sharciyeed (ALJ) ayaa ah inuu go'aamiyo haddii codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowristaleh u la kulmayo waxyaabaha korka ku qoran ee loo baahan yahay iyo in kale, oo adiga iyo degmada idiinku wargaliyo qoraal ahaan isla markaaba.

Wax Ka Beddelka Codsiga Dhageysiga

Adiga iyo degmada waxa laga yaabaa inaad beddeshaan codsiga dhageysiga kaliya haddii:

1. Dhinaca kale ay oggolaadaan wax ka beddelka qoraal ahaan oo la siiyo fursad ay ku xalliyaan codsiga dhageysiga iyada oo loo marayo kulanka xallinta, ee hoosta lagu sifeeyey; **AMA**

2. Wax aan ka dambayn shan maalmood ka hor inteyna dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ayna bilaabmin, sarkaalka dhageysiga ayaa bixiya oggolaansho inuu qabsoomo beddelakaasi.

Haddii dhinaca codsanyaa dhageysi u beddel ku sameeyo codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, jadwalka kulanka xallinta arrinta (gudahooda 15 maalmo taarikheed laga bilaabo markii la helay) iyo wakhtiga muddada loo qabto xallinta (gudahooda 30 maalmo taarikheed laga bilaabo markii la helay) ayaa bilaaban doona mar kale taariikhda codsiga la beddelay la xereeyo, ama taariikhda garsooruhu (ALJ) oggolaado codsiga.

Jawaabta Degmada ee ku Wajahan Codsiga Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista leh

Haddii dugsigu uuna kuugu soo dirin ogeysiis hore oo qoran, sida lagu sifeeyey hoostiisa cinwaanka **Ogeysiika Qoran ee Hore**, ee ku saabsan mowduuca ku jira codsigaaga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, degmadu waa inay, gudaheeda 10 maalmood markay helaan codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, adiga kuu soo diraan jawaab ay ku jirto:

1. Faahfaahinta sababta degmadu u soo jeedisay ama u diiddey inay tallaabada lagu soo qaaday codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh;
2. Sifeyn waxyaabaha la dooran karo ee kooxda IEP ilmahaagu qaddariyeen iyo sababaha loo diiday waxyaabaha la dooran karo;
3. Sifeyn nidaamka qiimayn kasta, qiiyaasta, diiwaanka ama warbixinta degmadu isticmaashay ee ay ku saleysay tallaabooyinka ay soo jeedisay ama diiday; **IYO**
4. Sifeyn qodobbada kale ee la xiriira tallaabada dugsigu uu soo jeediyay ama diiday.

Degmo ayaa laga yaabaa inay ku adkeysato in codsigaaaga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ay tahay kaafi-la'aan in kasta oo ay kugu siisay macluumaadka ku jira qodobbada 1-4 ee korka.

Jawaabta Dhinaca kale ee ku Wajahan Codsiga Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista leh

Marka laga reebo sida lagu sheegey cinwaanka korka ugu dhow ku yaal, **Qaabsocodyada Edbinta Ardayda U-Qalma Waxbarashada Gaarka ah,** dhinaca heleysa codisga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh waa inay, gudahood 10 maalmo taariikheed markay helaan codsiga, ugu diraan jawaab si gaar uga hadleysa arrimaha codsiga. Dhinac kasta ayaa wali ku adkeysan kara in codsigaaaga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh u yahay kaafi-la'aan.

Foomamka Tusaalaha ah
34 CFR §300.509; WAC 392-172A-05085

OSPI ayaa soo saartay foomka codsiga dhageysiga qabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh oo tusaale ahaan ah sidii ay kaa kaaga caawin lahayd xereynta codsiga dhageysiga qabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh. Foomka ayaa laga heli karaa goobaha internetka ee soo socda:

http://www.k12.wa.us/ProfPractices/adminresources/forms.aspx **AMA**
http://www.k12.wa.us/SpecialEd/mediation.aspx.

Adiga lagaagama baahana inaad isticmaasho foomkan. Hase ahaatee, xuuquda aad u leedahay dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ayaa laguu diidi karaa ama la daahin karaa haddii codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ayanna wadan dhammaan macluumaadka looga baahan yahay. Waxa kale oo aad ka heli kartaa nuqul ah codsiga dhageysiga waaxda waxbarashada gaarkaga ah ee degmadaada.

Meeleynta Ardayga Marka Dhageysiga Nidaamka xuquuq Dowrka leh La Sugayo
34 CFR §300.518; WAC 392-172A-05125

Marka laga reebo sida lagu sheegayo hoosta cinwaanka **Qaabsocoyada Marka La Edbinayo Ardayda Naafonimada leh**, marka dacwada nidaamka xuquuq dhowrista loo diro dadka dhinaca kale, muddada lagu jiro waqtiga xal helitaanka, iyo inta la sugayo go'aanka kasta ee ka soo fulaya eex-la'aan dhageysiga qaabsocod xuquuq dhowris leh ama maxkamadda tallaabo sharciyeedka ee go'aan rafcaan oo garsoore maamul sharciyeed (ALJ), ilmahaagu waa inuu ku jiro isaga/iyada waxbarashada lagu meeleeyey ee uu dhigto imika, haddii adiga iyo degmadu aad ku heshiisaan si kale mooye.
Haddii qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh ay ka mid tahay codsigii asalka ahaa ee galista dugsiga dowladda ah, ilmahaaga, iyadey la socoto oggolaanshahaagu, waa in lagu meeleeyaa barnaamij dugsiga dowladda illaa ay dhamaadaan habsocodyaada sharci.

Haddii codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowristu leh ay la xiriirto codsiga bilowga adeegyada hoos yimaadda Qeybta B iyo ee IDEA, ilmahaaga oo kala-guur ugu jira marxaladaha isbeddelka adeegyada kala ah Qeybta C oo u gudbaya Qaybta B ee IDEA maadaama ilmahaagu noqday saddex jir, degmadu loogama baahna iany bixiso adeegyada Qeybta C ee isagu ama iyadu heli jireen. Haddii ilmaha loo garto inuu u qalmo Qeybta B ee IDEA adiguna aad soo bixisid oggolaanshaha ilmahaaga si uu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira marka ugu horeysa, ka dib marka wali aan go'aan laga gaarin tallaabada sharciga ee la gaadhi lahaa, degmadu waxaa ku waajib ah inu siiyo ilmaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira kuwaasi oo aydan isku diiddanayn adigu iyo degmada.

Haddii Garsooraha Sharci Maamuleedku (ALJ) go'aamiyo in isbeddel meeleyn ay habboon tahay, go'aankaas la xiriira meeleynta waa in loo qaataa mid ka dhaxeeya adiga iyo degmo dugsiyeedka ulajeeddooyin ahaan meeleynta muddada rafcaanka maxkamadda ee go'aanka nidaamka xuquuq dhowrisa leh.

Nidaamka Xallinta
34 CFR §300.510; WAC 392-172A-05090

Markaad hereyso codsi dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, IDEA ayaa u baahan inaad ka qayb-qaadato kulan arrinta lagu xallinayo kar hor inta jadwalka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ayna bilaabmin.

Kulanka Xallinta

Markaad muddo 15 maalmood gudaheed aad ku hesho ogeysiiska dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, iyo ka hor inta aaney bilaabmin dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, degmadu waxaa ku waajib ah iney kula yeeshaan kulan iyo ciddii kale ee arrinta ku lug leh ama ciddii kale ee ka mid ah Xubinta Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiga (IEP) kuwaas oo u leh khibrad dheeraad ah xaqiijinta codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh. Kulanka:

1. Waa inuu ku jiro wakiil ka socda degmada oo leh awood go'aan-samayn uu ku matali karo degmada; **IYO**
2. Waa inuuna ku jirin qareen ay leedahay degmadu haddii aanu adigana kula socon qareen.

Ujeeddada kulanku waa inaad adigu kala hadasho codsigaaga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh iyo xaqiiqooyinka ay ku salaysan tahay codsigaagu, si dugsigu u helo fursad uu ku xalliyo khilaafka. Adiga iyo degmada ayaa go'aan ka gaadhaya xubnaha ku lug leh ee IEP ee u imanaya kulanka xallinta arrimaha.

Kulanka xallinta looma baahana haddii:

1. Adiga iyo dugsigu aad qoraal ahaan iskugu raacdaan inaa iska dhaaftaan kulanka; **AMA**
2. Adiga iyo degmada oo ku heshiiya inaad isticmaashaan nidaamkadhexdhexaadinta, sida lagu sifeeyey hoosta cinwaanka **Dhexdhexaadinta**.

Muddada Xallinta

Haddii ayna degmadu u xallin dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh si adigu aadan ku qanacsaneyn muddo gudaheed 30 maalmo taarikheed ee ay ku heleen codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh ayaa laga yaabaa inuu dhaco.

Muddada la qabtey ee ah 45–maalmood-taariikheed in lagu gaaro go'aanka kama danbeynta ah ee bilaabmi doonta muddada xallinta 30–maalmood-taariikheed markay dhammaato, iyada oo ay jiraan waxyaabo gaar ah oo ka reebban in lagu beego muddada la isku hagaajiyey ee 30- malmood-taariikheed, sida hoos ku qeexan oo kale.

Haddii adiga iyo degmadu labadiinuba aad isku raacdeen ka noqoshada go'aan gaaridda ama isticmaalka dhexdhexaadinta, ku guul dareysigaaga ka qeybqaadashada kulanka waxay dib u dhigi doontaa waqtiga loo qabtey go'aan gaarista iyo dhageysiga qaabsocodka xuquuq dhowrka leh ilaa aad oggolaaneyso inaad ka qeybqaadato kulanka.

Haddii dugsiga degmadu ayna kugu qancin karin adiga inaad ka qayb qaadato kulanka go'aan gaadhida kadib marka aad samayso dedaal macquul ah oo aad qoraalna ku hayso dedaalkan, degmadu waxaa laga yaabaa, in dhammaadka mudada go'aan gaadhka 30-ka maalmood-taariikheed, inay ka codsado garsooraha sharci maamuleed (ALJ) u joojiyo codsigaaga dhagesyiga nidaamka xuquuq dhowrista leh. Degmada dugsi waa inay diiwaan galisaa isku-dayadeeda inay abaabusho wakhtiga iyo goobtaba ku heshiisiinta labada dhinacba ah. Diiwaan galinta waxa ku jira isku-dayada , ay ka midka yihiin:

1. Diiwaan qor faahfaahsan oo ah talefoonnada la wacay ama la isku dayey iyo natiijooyinka wicitaannadaa talefonnada ;
2. Koobiyo ah waraaqihii lagu wada xiriirey ee laguu soo direy adiga iyo wixii jawaabo ee la helay; **IYO**
3. Diiwaan-qor faahfaahsan oo ah wixii booqashooyin gurigaaga lagu sameeyey ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Haddii ay degmadu ku guuldareysato inay qabato kulanka xallinta muddo ah 15 maalmood taariikheed gudahood oo ay ku heshay ogeysiiska codsigaagi dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrisa leh **ama** ku guuldareysato inay ka qeybqaato kulanka xallinta, waxaad weydiisan kartaa garsooraha sharci maamuleedka (ALJ) inuu amar ku bixiyo iney bilaabanto jadawalka 45- maalmood-taariikheed kama dambeyska leh ee dhageysiga nidaamka xuquuq dhorwrista leh.

Isku Hagaajinta 30ka-maalmood-Taarikheed ee Muddada Xallinta

Haddii adiga iyo dugsigu aad qoraal ahaan iskugu raacdaan inaa iska dhaaftaan kulanka xallinta; markaa muddada u dhigan ee 45- maalmood-taariikheedka ah ee

kama dambeyska ee loo qabtay dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrisa leh ayaa bilaabmeysa maalinta ku xigta.

Ka dib marka ay bilaabanto dhexdhexaadintu ama shirka xallintu oo ah ka hor dhammaadka 30 –maalmood-taariikheed ee muddada xallinta, haddii adiga iyo degmadu aad ku heshiisan qoraal ahaan inuuna heshiis ahayn suurto gal ah, markaa jadwalka 45-maalmood-taariikheed ee kama dambeyska ee loo qabtay dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa bilaabmeysa maalinta ku xigta.

Haddii adiga iyo degmadu aad ku heshiisaan inaad isticmaashaan nidaamka dhexdhexaadinta, dhammaadka 30 maalmood-taariikheed ee muddada xallinta, labada dhinacba waxay ku heshiin qoraal ahaan inay ku sii wataan dhexdhexaadinta illaa heshiis adag la isla gaarayo. Hase yeeshe, haddii midkiin adiga ama dugsigu aad ka noqotaan nidaamka dhexdhexaadinta markaa muddada u dhigan ee 45- maalmood-taariikheedka ah ee kama dambeyska ee loo qabtay dhageysiga qaabsocodka nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa bilaabmeysa maalinta ku xigta.

Heshiiska Dajinta ee Qoran

Haddii adiga iyo degmadu aad ku xallisaan khilaafkiina kulan wax xallin ah, adiga iyo degmadu waa inaad gashaan heshiis sharcigu qabanayo oo ah:

1. Aad saxeexdeen adiga iyo wakiil ka mid ah degmada oo awood qabaneysa degmada leh **; IYO**
2. Meelmarin ku leh maxkamad sare kasta oo ku taal Gobolka Washington khibradna ku leh arrinta ama maxkamad degmo oo ka tirsan Mareykanka (Gobolada Mideysan).

Muddada Dib-u-Eegidda Heshiiska

Haddii adiga iyo degmadu aad gashaan heshiis ka yimid natiijo ahaan kulan wax lagu xallinayo, adiga ama degmada midkiinba ayaa kaga noqon kara heshiiska gudaheeda 3 maalmo meheradeed laga bilaabo wakhtiga labadiinuba adiga iyo degmadu aad saxeexdeen heshiisa.

Dhageysi Nidaam Xuquuq Dhowris Eex-La'aan Ah 34 CFR §300.511; WAC 392-172A-05080–05095

Guud Ahaan

Marka kasta oo la xereeyo codsi dhageysi nidaam Xuquuq Dhowris leh, adiga ama degmada khilaafka ku jiraa waa inaad lahaataan fursad dhageysi nidaam Xuquuq Dhowris eex-la'aan ah.

Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ)

Dhageysiga waxa samayn doona ALJ (Garsoore Sharci Maamuleed) madax-bannaan oo u-qalma arrinta, shaqaalena u ah Xafiis Maamuleedka Dhageysiga (OAH).

Ugu yaraan, Garsooraha Sharci Maamuleed (ALJ):

1. Waa inuu noqdaa shaqaale OSPI ama degmada ku dhex jirta arrinta waxbarashada iyo daryeelka ilmaha. Hase yeeshe, qofku ma noqon shaqaalaha haya'dda sababta oo ah kaliya isaga ama iyada ayey haya'ddu siisay lacag inuu noqodo ALJ (Garsoore Sharci Maamuleed).
2. Waa inuuna u yeelan xiise gaar oo shaqsiyeed ama shaqo oo keenaya iska-horimaad ujeeddada Garsooraha Sharci Maamuleed (ALJ) ee ku jiradhageysiga.
3. Waa inuu noqdaa qof culuun u leh oo fahansan xeerarka IDEA, iyo sharciyada federaalka ah iyo xeerarka gobolka ee ku saabsan IDE, iyo tarjumadda sharci ee IDEA ee maxkamadaha federaalka iyo kuwa gobolkaba; **IYO**
4. Waa inuu leeyahay culuunta iyo kartida u dhageysiga ku wadayo, iyo inuu go'aannada gaaro oo u qoro, iyada u hoggaansan oo ku habboon heer ku dhaqanka sharciga.

Degmo kasta ayaa ah inay haysato liis ka kooban dad u noqdada Garsoorayaal Sharci Maamuleed (ALJ). Liiska waxa la socda kelmado sheegaya u-qalmintaannada qof kasta oo ah ALJ.

Mawduuca ku Saabasan Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista Leh

Dhinaca codsata dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh waa ineyna soo qaadin arrinta dhegaysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh arrimo aan ku jirin codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, illaa dhinacyadu isku raacaan mooyee.

Jadwalka Loogu Talagalay Dhageysiga

Adiga ama degmadu waa inaad ku xereysaan dhageysigiina nidaamka xuquuq dhowrista leh gudahooda labo sano laga bilaabo taariikhda adiga ama degmadu aad ogeydeen, ama ay ahayd inaad ogaataan, waxa ku saabsan arrimaha lagaga qabanayo codsiga dhageysiga.

Waxyaabaha ka Reebban Jadwaalka

Jadwalka korka ku yaal saamayn ma laha haddii adigu aad xereyn kari weyday codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh sabab awgeed:

1. Degmada oo gaar ahaan ku been sheegtay inay xallisay dhibaatada ama arrinta aad adigu ku soo qaadday codsiga dhageysiga; **AMA**
2. Degmada oo adiga kaa qarisay macluumaad looga baahanaa inay ku siiso iyada oo hoos timaad Qaybta B ee IDEA.

Xuquuqaha Dhageysiga
34 CFR §300.512; WAC 392-172A-05100

Guud Ahaan

Adiga iyo degmada dugsi, idinka oo dhinacyada kala ah ayaad dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh (oo ay ku jirto dhageysi la xiriira nidaamka edbinta) xaq u leedihiin:

1. Inuu ku weheliyo oo u kula taaliyo qareen iyo/ama dad cilmi gooni ah ama tabbar la xiriira dhibaatooyinka ardayda naafonimada leh.
2. Hor-keenka caddaynta iyo waji iskaga-hor-imaadka, iyo su'aalo weydiinta, iyo dalbashada inay markhaatiyo ka soo qayb galaan;
3. Inaad u diiddo horkeenka caddayn kasta dhageysiga aan daah looga qaadin dhinaca kale ugu yaraan shan maalmood meheradeed ka hor dhageysiga;
4. Inaad hesho diiwaan qoran, ama, haddii aad doorbidayso dhageysiga oo elektoroonik ah; oo ereyba-erey u diiwaan gashan **IYO**
5. Inaad hesho diiwaan qoran, ama, haddii aad doorbidayso wixii la ogaaday iyo go'aannadii oo elektoroonik ah.

Macluumaad Dheeraad ah oo Daah-uga-Qaadka ku Saabsan

Ugu yaraan shan maalmo-shaqo ka hor dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, adiga iyo degmadu waa inaad daaha iskaga qaaddaan dhammaan qiimeynta la dhameeyay taariikhdaas iyo talooyinka, ku saleysan qiimaynahaas adiga iyo degmadu aad ku talo jirtaan inaad isticmaashaan.

Garsooraha Sharciga maamuleed (ALJ) ayaa iska hor-taagi kara dhinac kasta oo ka dhaca inay u hoggaansamaan waxyaabaha looga baahan yahay ee la xiriira qiimeynta ama kula talinta ee lagu oofinayo dhageysiga iyada oon laga helin oggolaansho dhinaca kale.

Xuquuqaha Waalid ee Dhageysiyada

Waa in lagu siiyaa xaqa in:

1. Ilmahaagu joogo goobta;
2. Loo furo dhageysiga dadweynaha, **IYO**
3. Lagu siiyo waxa diiwaanka dhageysiga ku qoran, xaqiiqihii la helay iyo go'aammadii la soo gaaray iyaga oo wax kharash ah adigu kuugu kicin.

Jadwallada iyo Ku Habboonaanta Dhageysiyada
34 CFR §300.515; WAC 392-172-05110

Iyada oon ka dambayn 45 maalmo taariikheed kadib markay dhacdo 30-maalmo-taariikheed ee muddada loogu talagalay kullannada xallinta **ama** iyada oon ka dambayn 45 maalmo taariikheed kadib markay dhacdo muddada wakhtiga xallinta la isku-hagaajiyay:

1. Go'aan kama-dambeys ayaa lagu gaaray dhageysiga; **IYO**
2. Nuqul ah go'aanka oo loo diro dhinac kasta.

Garsooraha (ALJ) laga yaabaa inuu siiyo u dheereymo akhti oo ka baxsan wakhtiga 45-maalmood-taariikheed ee wakhtiga muddada lagu sifeeyey kor sida ay codsadaan labada dhinac midkood.
Dhageysi kasta waa in lagu qabtaa waqti iyo goob idinku habboon si macquul ah adiga iyo ilmahaaga.

Go'aammada Dhageysiga
34 CFR 300.513; WAC 392-172-05105

Go'aanka Garsooraha (ALJ)

Go'aanka garsooraha (ALJ) haddii u ilmahaagu helay waxbarashada bilaashka ah ee ugu habboon ee dawladda (FAPE) waa inay ku saleysnaato dhidibbo adag.

Dhageysiyada aad ku dacaweyneyso degmadu inay sameysey xadgudub nidaam, garsooraha (ALJ) ayaa heli kara in ilmahaagu uun helin waxbarashada dowliga ah ee bilaashka ah (FAPE) kaliya haddii nidaamka wax u dhiman yihiin:

1. U ka dhex-galay xuquuqda ilmahaagu u leeyahay waxbarashada dawliga ah ee bilaashka ah (FAPE);
2. Si badan u faragaliyey fursaddaada inaad ka qaybqaadato nidaamka go'aan gaarista ee khuseeya xeerka waxbarashada dawliga ah ee bilaashka ah (FAPE) ee ilamhaaga; **AMA**
3. Kuu horseedday waayitaan waxatar waxbarasho.

Micneynta Qodobka

Xitaaa haddiii u garsooraha (ALJ) u waayo inayna jirin xadgudub FAPE, garsooraha ayaa laga yaabaa wali inuu u amro degmada inay u hoggaansanaato waxyaabaha loogaga baahan yahay qaybta dhowritaanka nidaameed ee sharciyada federaalka ah ee hoos yimaad Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 illaa 300.536).

Codsiga Gaarka ah ee Loogu Talagalay Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrista leh

Waxaa laga yaabaa inaad xereyso codsiga ka gaar ah oo dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh oo ah arrin ka duwan codsi dhageysi nidaamka xuquuq dhowrista leh oo horay loo xereeyey.

Natiijooyinka iyo Go'aanka Guddiga La-Talinta iyo Dadweynaha Guud

OSPI waxay tirtirtaa macluumad kasta oo shaqsi lagu garan kar iyo:

1. Waxay siisaa natiijooyinka iyo go'aannada dhageysiyada nidaamka xuquuq dhowrista leh Guddiga La-Talinta Waxabarashada Gaarka ee Washington (SEAC); **IYO**
2. Waxay uga dhigtaa natiijooyinka iyo go'aannada inay dadweynuhu heli karaan.

G'aanka Kama-Dambeynta; Rafcaanka 34 CFR §300.514; WAC 392-172A-05115

Go'aan lagu gaaray dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh waa kama-dambeys haddii adiga ama degmadu aad rafcaan ka qaadataan go'aanka mooyee, idinka oo qaada dacwo madani ah. Waxa jira jadwallo gooni ah oo lagu qaato dacwadda madaniga ah. Maxkamaduhu waxa dhici karta inay kuu xukumaan lacagaha (ajuurada) u qareenku qaatay.

Go'aan lagu gaaray dhageysi nidaam xuquuq dhowris leh (oo ay ku jirto dhageysi la xiriira qaabsocoyada edbintu) waa kama-dambays, haddii dhinaca kale (adiga ama degmada) aad ku jirtaan rafacaannada dhageysiga ee aad ka qaadateen go'aanka idinka oo dacwo madaniya qaaday mooye, sida lagu sifeeyey hoosta.

Tallaabooyinka Madaniga ah, oo ay ku Jirto Muddada Wakhtiga Lagu Xereynayo Ficilladan
34 CFR §300.516; WAC 392-172A-05115

Guud Ahaan

Haddii dhinac kastaa ayna ku raacsaneyn natiijooyinka iyo go'aankaa ka soo baxa dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh (marka lagu daro qaabsocodka la xiriira edbinta) waxay leedahay xaq lagu keeni karo dacwada madaniga marka loo eego mawduuca lagaga hadlayo dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh. Laga yaabaa in ficilka la keeno maxkamad Gobol oo u-qalanta awoodda (Maxkamad Gobol oo awoodda u leh dhageysiga kiiska noocani oo kale ah) ama maxkamad degmo oo Mareykan. Maxkamadaha degmo ee Mareykanka ayaa awoodda u leh inay xukumaan dacwooyinka la keeno iyaga oo hoos yimaad Qaybta B ee IDEA iyada oon loo eegin qaddarka la isku khilaafayo.

Xaddidka Wakhti

Dhinaca keenaya dacwada ayaa haysta 90 maalood-taariikheed laga bilaabo taariikhda go'aanka garsooraha (ALJ) inay xereeyaan dacwo madani ah.

Qaabsocoyada Dheeraadka ah

Dacwo madani oo kasta, maxkamadda:

1. Ayaa hesha diiwaannada iyo qaabsocodyada maamuleed;
2. Ayaa dhageysta caddaymaha dheeradka ah markaad weydiisato ama degmadu codsato; **IYO**
3. Waxay ku salaynaysa go'aankeeda sida cadaymahu qaalib u yihiin oo waxay bixisaa siideynta maxkamaddu u garato inay ku habboon tahay. .

Micneynta Xeerka

Ma jiraan wax xaddidi kara ama yareynaya xuquuqda uu qofku leeyahay ee Qeybta B ee IDEA ama qaabsocoyada iyo sixitaannada la heli karo ee hoos yimaadda Dastuurka Mareykanka, Shariciga Mareykanka Naafonimada leh, Qodobka V ee Sharciga Dhaqan-celinta ee 1973 (Qaybta 504), ama sharciyada kale ee Dowladda Federaalka ah ee dhowra xuquuqda ay leeyihiin ardayda naafonimada leh.

Hase yeeshe , haddii aad xereyneyso dacwad madani ah oo hoos yimaad sharciyadan oo aad raadineyso caawimo waliba lagu helo karo hoosteeda Qaybta B ee IDEA, qaabsocodka nidaamka xuuq dhowrka sharciyeed ee dhageysiga lagu sifeeyey korka waa in la dhammeys tiraa sida looga baahan yahay haddii aad xereyso dacwad hoos timaad Qaybta B ee IDEA. Tan micnaheedu waa adigu in laga yaabaa inaad haystado sixitaanno hoos yimaad sharciyada kale ee iska dul baxa marka loo eego sharciga hoos yimaad IDEA, laakiin guud ahaan si aad caawimo aad uga heshid hoosta sharciyadan, waa inaad amarka hore isticmaashaa nidaamka xuquuq dhowrista leh ee dhageysiga

eex-la'aan ah sidii aad u heli lahayd sxitaanno laga hoos heli karo IDEA ka hor si toos ah intaa loo tagin maxkamadda.

Kharashka (Ajuurada) Qareenka
34 CFR §300.517; WAC 392-172A-05120

Guud Ahaan

Wixii kasta ee ah dacwo madani ee uu wakiil ka yahay qareen, maxkamadda, ayaa dhici karta inay awooddeda ugu xukunto si macquul leh lacagta qareenka iyada qayb ka mid ah kharashka kaa baxay adiga.

Wixii kasta ee ah tallaabo sharci ama qaabsocod sharci ee la fulinayo ee hoos yimaadda Qeybta B ee IDEA, maxkamadda, go'aankeeda, ayaa dhici karta inay u xukunto si macquul leh lacagta qareenka iyada qayb ka mid ah kharashka ka baxay degmo dugsi guuleysatay, ama OSPI, inuu bixiyo qareenkaagu, haddii qareenkaagu: (a) xereeyey cabasho ama kiis maxkamadeed oo maxkamadu u aragtay bilaa-macni, wax aan macquul ahayn, ama sal ay ku fariisato aan lahayn **AMA** (b) u ku sii socdo dacwada markay iska caddaatay in dacawadu tahay bilaa-macni, wax aan macquul ahayn, ama sal ay ku fariisato aan lahayn **AMA**
Wixii kasta ee ah tallaabo sharci ama qaabsocod sharci ee la keeno iyada hoos imaneysa Qeybta B ee IDEA, maxkamadda, go'aankeeda, ayaa dhici karta inay u xukunto, si macquul leh, lacagta qareenkaka iyada qayb ka mid ah kharashka ka baxay degmada dugsi ee guuleysatay, ama OSPI, inaad adigu bixiso ama uu bixiso qareenkaagu, haddii dhagaysiga codsigaaga nidaamka xuquuq dhowrista sharciyeed ama kiis maxkamadeed oo kale la soo bandhigey oo ah wixii kasta ee aan u-jeeddo habbooneyn leh sida, dhibaateynta, si ay u dhacdo baajin aan loo baahanayn, ama iyada oo aan loo baahanayn kordhiya kharashka nidaamka dacwada ama qaabsocodka sharci.

U Xukunka Ajuurada (Fees)

Lacagaha qareenku waa inay ku saleysnaataa sicirka ka jira beesha dacwadu ama dhageysigu ka dhacayo ee u dhiganta nooca iyo tayada adeegyada la bixiyey. Gunno ama ku-dhufte (multiplier) loo isticmaalayo xisaabinta ajuurada (lacagaha qareenka) la xukumo.
Lacagaha qareenka ayaan loo xukumeynin oo kharashyada la xiriira aya dib loogu soo celinayn dacwo ama qaabsocod sharci kasta oo hoos yimaad Qayb B ee IDEA adeegyada loogu hawlgalay kadib marka wax u fidin xallin oo qoran adiga lagu siiyey haddii:

a. U fidinta ayaa loo sameeyey isla wakhtiga lagu sheegay Xeerka 68 ee Xeerarka Federaalka ee Dacwada Madaniga ah ama, markay tahay dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh , ama dib u eegid heer-gobaleed ah, wakhti kasta oo ka badan 10 maalmood taarikheed kahor intaanay dacwadu bilaabmin;

b. U fidinta aan lagu aqbalin 10 maalmo taarikheed gudahooda; **IYO**
c. Maxkamada ama ALJ (Garsoore Sharci Maamuleed) ayaa helay in manfaca aad heshay aanu ka wanaagsanayn u fidinta xalka aad ka helayso.

In kasta oo xaddidyadani jiraan, maxkamadda ayaa kuu xukumi karta adiga lacagta qareenka iyo kharashka la xiriira haddii aad adigu guuleysato oo aad si macquulana aad garta ugu leedahay diidmada wax u fidinta xalka la raadinayo.

Lacagaha qareenka la siiyo (ajuurada) ayaan loo xukumeyn arrimaha la xiriira kulan kasta kooxda IEP illaa kulanka loo qabto natiijo ka timid qaabsocod maamuleed ama dacwad maxkamadeed.

kulanka xal-u-helidda ee looga baahan yahay hoos imaadka Qaabsocodyada dhageysiga nidaamka xuuq dhowrka leh ayaan loo qaddarin inuu yahay kulan ku yimid natiijo ahaan maamul dhaygeysi ama dacwad maxkamadeed, waxa kale oo aan loo haysan inaanu ahayn maamul dhagaysi ama dacwad maxkamadeed iyada oo loola jeedo lacagta la siinayo qareenka:

Maxmakadu sida ugu habboon ayey u dhimeysaa inta lacaga loo xukumo qareenka markay hoos timaad Qeybta B ee IDEA, haddii ay maxkamadu garato in:

1. Adiga ama qareenkaagu, muddada ficilka ama dacwada, aad sabab la'aan u daahisaan Xallinta kama danbaysta ah ee khilaafka;
2. Qaddarka lacagta ajuurada ah ee qareenka ee sida kale awoodda loo siiyey in loo xukumo oo si aan macquul ahayn uga badata saamiga saacadeed ee beesha ka jirta ee adeegyada la midka ah oo ay ku fuliyaan looyaro si macquul xirfadahaas, macaamil wanagasan iyo waayo aragga u leh.
3. Wakhtiga lagu qaatay iyo adeegyada sharciga ee la bixiyey oo loo arko inay xad-dhaaf yihiin marka loo eego nooca ficilka ama dacwadda; **AMA**
4. Qareenka ku metalaya adiga oo aan siin degmada macluumaadkii habboonaa ee ogeysiiska codsiga nidaamka xuquuq dhowrista leh sida lagu sifeeyey hoosta cinwaanka **Codsiga Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka leh.**

Hase yeeshe, maxkamaddu ma aha inay naaqusto ajuurada haddiii maxkamaddu garato in gobolku ama degmadu ay si aan caqligal ahayn u daahiyeen xalka tallabaada ama dacwadda haddii ay jireen ku xadgudub hoos yimaad xeerarka qaabsocodka dhowritaanka nidaameed ee ka midka ah qaybta B ee IDEA.

Qaabsocodyada Edbinta Ardayda U-Qalma Waxbarashada Gaarka ah

Waxa jira dhowritaanno la siiyo ilmahaaga marka isaga ama iyada la edbinayo. Dhowritaanka ayaa u dheer qaabsocoyada edbinta ee loo isticmaalo dhammaan ardayda. Dhowritaankan ayaa waliba loo isticmaalaa ardayda aan wali loo garan u-qalmitaanka waxbarashada gaarka ah haddii degmadu ay ahayd inay ogaato in ardaygu u qalmi doono.

Xeerarka Hakinta iyo Eryitaanka ee Loogu Talagalay Dhammaan Ardayda
(WAC) 392-400

Markay degmadu hakiso ama ka erido ilmahaaga, waa inay raacdaa sharciyada iyo xeerarka Gobolka Washington ee u dhigan edbinta ardyada dhammmaantood. Xeerarka edbinta ee Gobolka Washington waxay ku yaallliin cutubka 392-400 WAC. Degmoonyinka ayaa leh ujeedddoyin iyo nidaamyo ay ku sifeeyaan nocaca kala duwan ee edebdarrada iyo sidii ay u jahayn lahayeen ganaaxyada lagu soo rogey edebdarrada oo waa inay raacaan nidaamyadan. Nidaamyadan degmadu waliba waxay sifeeyaan sidii aad uga hor-iman lahayd go'aankeeda ku saabsan edbinta ilmahaaga. Marka laga reebo xaaladaha degdegga ah (imerjansiyada) iyo xadguduyada hubka, degmoonyinka ayaa guud ahaan aan ka hakin ama aan ka eryin arday kasta haddii isku dayeen mooye tallaabo qaabab kale oo sixitaan ah oo markaa wax ka beddelaya anshaxa ardayga.

Markay hoos timaad 392-400 WAC, hakintu waa ka kaxaynta hal cashar, xiisad, ama fasal jadwalsan oo buuxa muddo wakhti **go'an**. *Ka eryitaanku* waa ka kaxaynta hal cashar, xiisad, ama fasallo jadwalsan oo buuxa muddo wakhti aan **go'neyn**.

Iska hubi inaad adigu ogsoon tahay jadwallada muddooyinka loogu talagaly ka-hor-imaadka go'aanka degmada ee ku saabsan edbinta hoos imanaya qaabsocoyada guud ee waxbarashada, iyo iyada oo loo marayo qaabsocoyada dhageysiga ee degmada. Jadwalladan ayaa ka duwan jadwallada aad adigu u yeelan karto codsiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ee waxbarashada gaarka ah ee ku eedeyneysa degmadu inayn raacin qaabsocoyada edbinta waxbarashada gaarka ah.

Awoodda Shaqaalaha Dugsi
34 CFR §300.530; WAC 392-172A-05145

U Go'aaminta Kees-ka-Kees

Shaqaalaha dugsi ayaa dhici karta inay tix-galiyaan xaalado kasta oo gaarka ah, iyada oo mid kasta gaar ahaanteed loo eegayo in beddel meeleyn, iyada oo la lug heleysa waxyaabaha looga baahan qodobkan, oo ay ku habboon tahay ilmo leh naafonimo oo ku xadgudba Xeerka Anshaxa Ardayga.

Guud Ahaan

Shaqaalaha dugsi waxa laga yaabaa, Inayna wax ka badan **10 maalmo dugsi** oo isku daba xigta, uga kaxayn ilmaha meeleynta isga ama iyada oo ay kaxeeyaan goob waxbarasho oo ka duwan oo ku habboon, ku meelgaarna ah (oo ay tahay inay u gartaan kooxda IEP), ama goob kale, ama ka hakin, marka isagu ama iyadu u ku xadgubo xeerka anshaxa ee ardayga, haddii ay waliba ka kexeeyaan arday ku jira xaalad la mid ah oo aan lahayn naafonimo. Shaqaalaha dugsi ayaa dhici karta waliba

inay ku soo rogaan ka kaxaymo dugsi dheeraad ilmaha, oo aan ka badnayn **10 maalmo dugsi** oo isku dabaxigta ee dhacdooyinka ka gaarka ah ee anshax xumada, illaa inta ka kaxaymahaasi ayna ahayn meeleyn beddel (fiiri **Beddelka Meeleynta Sabab Ka-Kaxaymo Edbin** ee qeexitaanka, hoosta).

Marka ilmahaaga la kaxeeyo isaga ama iyada ku meeleyntooda hadda jirta wadar ahaan toban **10 maalmo dugsi** hal sano dugsi isku mid ah, degmada waa inay, muddada maalmo kasta oo ku xigta ee ka kaxaynta sannad dugsi, waa inay bixisaa, muddada ka kaxaynta maalmaha isku daba-xiga ee sannad dugsiyeedka, adeegyo illaa xadka laga rabo ee hoosta ku qoran madax-ka-hoosaadka **Adeegyada**.

Awoodda Dheeraadka ah

Haddii anshaxa ardayga xadgudubka galay aanay ahayn astaanta naafonimada ilmahaaga (fiiri **Astaanta Go'aaminta**, hoosta) iyada oo la beddalyo meelaynta edbinta iyada oo aan ka badnaanayn **10 maalmo dugsiyeed** oo ah maalmaha dugsiga ah oo isku dab xiga, shaqaalaha dugsi waxay ilmahaas u adeegsan karaan habka edbina ilmaha naafonimada leh sida loogu sameeyo iyo wakhti ahaan inta lagu sameeyo ardayda aan naafonimada lahayn, marka laga reebo inuu dugsigaasi siiyo adeegyada hoos lagu sifeeyey ee hoos yimaadda **Adeegyada**. Kooxda IEP-ga ilmahaaga ayaa go'aamiya goobta waxbarasho ku-meelgaarka ah ee duwan ee loogu talagalay adeegyada ilmaha ee xaaladdan.

Adeegyada

Adeegyada ay tahay in loo bixiyo ilmahaaga, markuu isagu ama iyada la kaxeeyey goobta isagu ama iyadu ku meeleeysan yahay hadda ayaa dhici karta in lagu siiyo goob waxbarashada duwan oo ku meel-gaar ah.

Degmada loogama baahana inay siiso adeegyo ilmahaaga haddii isagu ama iyadu laga saaray meeleynta hadda jirta ee isaga ama iyada 10 maalood dugsi ama wax ka yar ee sannad dugsiyeedkaas, haddii ay siiso adeegyo ardayada aan noofonimada lahayn oo sidooda oo kale la kaxeeyey mooye.
Haddii ilmahaaga laga kexeeyey meeleynta hadda jirta ee isaga ama iyada wax ka badan 10 maalood dugsi ilmahaaga waa in la:

1. U ku sii wataa helitaanka adeegyada waxbarashada, sidii awood loogu siin lahaa ilmahaaga in u ku sii wato ka qayb-qaadashada minhajka waxbarashada, in kasta oo ay goob kale, iyo in u horay ugu maro sidii uu ula kulmi lahaa hadafyada loo dajiyey IEP-ga isaga ama iyadu leedahay, **IYO**
2. Haddii anshaxa ilmahaagu unaa ahayn calaamad ka timid naafonimada isaga ama iyada waa inay helaan , sidu ugu habboon, qiimayn anshax dhaqameed, iyo adeegyada wax-ka-qabadka iyo beddelka anshaxa, oo loogu talagalay si ay wax uga qabtaan xadgudubka anshaxa sidii mar kale ayna u dhicin.

Ka dib marka ilmahaaga laga kaxeeyo meeleynta hadda jirta ee isaga ama iyada **10 maalood dugsi** isla sannad dugsiyeedkaas, iyo **haddii** ka kaxaynta hadda jirtaa tahay **10 maalood dugsi** oo isku dabxigta ama ka yar tahay, iyo haddii ka-kaxayntu aan loo garan inay tahay beddel meeleyn (fiiri qeexitaanka hoosta), **markaa** shaqaalaha dugsi, iyaga oo la tashanaya ugu yaraan hal macallimiinta u dhigta ilmahaaga ah, ayey go'aaminayaan xadka illaa inta loo baahan yahay adeeyada sidii ilmahaaga karti loogu siin lahaa inuu sii wato ka qayb-qaadahsada minhajka waxbarashada guud, in kasta oo goob kale, iyo horay loogu mari lahaa la kulanka himilooyinka loo dajieyey IEP-ga ilmahaaga.

Haddii ka kaxayntu tahay beddel meeleeyn, (eeg qeexitaanka hoosta) kooxda IEP-ga ilmahaaga ayaa oogaan doona adeegyada habboon sidii awood loogu siin lahaa ilmahaaga in u ku sii wato ka qayb-qaadashada minhajka waxbarashada, in kasta oo ay goob kale, iyo in u horay ugu maro sidii uu ula kulmi lahaa hadafyada loo dajiyey IEP-ga isagu ama iyadu leedahay.

Beddelka Meeleynta Sabab Ka-Kaxaymo Edbin 34 CFR §300.536; WAC 392-172A-05155

Ka kaxaynta ilmahaaga goobta waxbarasho ee u ku meeleeysan yahay isagu ama iyadu hadda ayaa ah **Beddel Meeleeyn** haddii:

1. Ay ka-kaxayntu ka badan tahay toban 10 maalmo dugsi oo isku daba-xiga; **AMA**
2. Ilmahaaga lagu sameeyey ka-kaxaymo isku dab-taxan oo wax muujinaya wax laga fahmi karo sababta oo ah:
   a. Ka kaxaymaha taxanayaasha ah oo marka la isku geeyo ka badan toban 10 maalmo dugsi gudaheeda hal sannad dugsiyeed;
   b. Anshaxa ilmahaaaga oon inta ugu badan la mid ah anshaxii isaga ama iyada ee dhacdooyin hore ee ku dambeeyey ka kaxaymo taxanayaal ah; **IYO**,
   c. Ay jiraan arrimo dheeraad ah oo la qiyaasayo ee ay ka midka yihiin dhererka muddada ka kaxayn kasta, marka la isku daro wakhtiga ilmaha laga kaxeeyey, iyo isku dhawaanshaha ka kaxaymahu isku dhow yihiin.

Dugsiga degmo ayaa go'aaminaya in ka kaxaymahu ay ka dhiganyihiin beddel meeleeyn lagu gartay xaalad kasta gaarkeeda iyada oo ay u eegayaan dugsi degmo iyo, haddii laga hor yimaad, waxay noqoneysaa in dib-loo eego iyada oo la raacayo qaabsocodka sharciga nidaamka xuquuq dhowrka leh iyo Qaabsocodyada garsoorka.

Wargalinta

Taariikhda ay degmadu go'aanka sameysay inay ka kaxeyso oo ah beddel meeleyn looguna talagalay ilmahaaga sabab ku xadgudub xeerka anshaxa ardayga awgeed, waa inay adiga kuu wargalisaa go'aanka, oo ku siisaa adiga wargalin ah dhowritaanka nidaameed.

Astaanta Go'aaminta

10 maalmood dugsi gudahood ka dib go'aanka kasta oo beddelaya meeleeynta (fiiri **Beddelka Meeleynta Sabab Ka-Kaxaymo Edbin**) ee ilmahaaga oo sababtu tahay xadgudub xeerka ardayga anshaxa, degmada, iyo xubnaha Kooxda IEP arrinta ku lug leh, oo adigu aad go'aamisay iyo degmadu, waa inay dib u eegtaa dhammaan macluumaadka arrinta ku lug leh ee faylka ilmahaaga ku jira, oo ay ka midka yihiin IEP isagu ama iyadu leedahay, iyo macluumaad kasta oo ku lug leh oo adigu aad bixisay si loo go'aamiyo:

1. Haddii anshaxa arrintiisa lagu jiro sabab u tahay, ama xiriir badan oo si toos ah, ugu leedahay naafinimada ilmahaaga **AMA**
2. Haddii anshaxa arrintiisa lagu jiro ay si toos uga timid natiijo ahaan ka gaabinta degmadu inay hirgaliso IEP-ga ilmahaaga.

Haddii xubnaha ku lug leh arrinta ee kooxda IEP ee ilmahaaga, oo adigu aad ku jirto, ay gartaan in lala kulmay xaaladahaas midkooodba ha haatee, anshaxa waa in loo gartaa inay tahay wax ka yimid naafonimada ilmaha.

Haddii kooxda korka lagu sifeeyey ay go'aamiso in anshaxu laga hadlayaa uu haa mid toos natiijadeedu uga timid ka gaabinta degmadu inay meelmariso IEP-ga, degmadu waa inay tallaabo degdeg ah ka qaaddo sidii ay u kabi lahayd khaladaadkaas.

Go'aaminta in Anshaxu Yahay Wax ka Yimid Naafonimada Ardayga.

Markay kooxdani, oo adigu aad ku jirto ay gartaan in anshuxu u yahay wax ka yimid naafonimada ilmaha, kooxda IEP waa inay midkoodna ha noqotee:

1. Bilaabaan inay sameeyaan qiimayn dhaqan hawleed, haddii aanay degmo dugsiyeedku qiimayn anshax oo shaqaynaysa kahor anshaxaa keenay dhicitaanka beddelka meelaynta, iyo meelmarinta qorshaha dhaxalgalka anshaxa ee ilmahaaga; **AMA**
2. Haddii qorshaha dhexgalka anshaxa hore loo dajyey, dib u fiiri qorshaha dhexgalka anshaxa oo beddel, sida daruuriga ah, si wax looga qabto anshaxa ilmaha.

Laga reebo sida lagu sifeeyey hoosta iyaga hoos imaneysa cinwaan hoosaadka **Xaaladaha Gaarka ah,** degmadu waa inay ku soo celisaa meeleynta isaga ama iyada laga saaray, haddii mooye adiga ama degmadu aad ku heshiisaaninay meelayntu tahay qayb ka mid ah beddelka qorshaha dhexgalka anshaxa.

Xaaladaha Gaarka ah

Shaqaalaha dugsi waxa laga yaabaa inay ilmahaaga u kaxeeyaan goob waxbarasho oo ka duwan oo ku habboon, ku meelgaarna ah (oo ay tahay inay u garataan kooxda IEP), iyada oo loo eegin inuu ilmaha anshaxiisu ka timid naafonimadiisa(deeda0, illaa 45 maalmo dugsiyeed, haddii isagu ama iyadu :

1. Hub u soo qaato (eeg qeexitaanka hoosta) dugsiga ama u ku haysto hub dugsiga, agagaaraha dugsi, ama meel howl dugsi lagu hayo oo hoos timaad maamulka degmada;
2. Ogaan u haysto ama u isticmaalo duroogo sharci-darro ah (fiiri qeexitaanka hoosta) ma iibiya ama isku daya in dadka ka iibiyo walax kontoroolan (eeg qeexitaanka hoosta) marka u joogo dugsiga, agagaaraha dugsi, ama meel howl dugsi lagu hayo oo hoos timaad maamulka Wakaalad Waxbarasho Gobol ama degmo dugsi; **AMA**
3. U dhaawac halis jirka ah uu u geystey (fiiri qeexitaanka hoosta) qof kale, marka u joogo dugsiga, agagaaraha dugsi, ama meel howl dugsi lagu hayo oo hoos timaad maamulka degmo dugsi.

Qeexitaanno

Walaxda la kontoroolo micnaheedu waa duroogo ama walaxa lagu aqoonsaday hoosteeda jadwallada I, II, III, IV, ama V e ku jira Qaybta202(c) ee Xeerka Walaxa la Kontorolo (21 U.S.C 812 (c)).

Duroogada sharci-darrada ah micnaheedu waa walax la kontorolo laakiin ayna ku jirin walax si sharci ah loo haysto ama la isticmaalo iyada oo ay kormeerayaan xirfad yaqaanno daryeel-caafimaad sharciyeysan ama si sharci ah loo haysto am loo isticmaalayo awood kasta oo kale oo hoos timaad qodobbada sharci kasta oo dawladda Federaalka leeyahay.

Dhaawac halis ah o ku yimaad jirka micnaheedu waa dhaawaca ku yimaad jirka ee ay u weheliyaan: waxyeello halis badan u leh dhimasho, dareen xanuun aad u badan, jirka qofka isbeddel badani oo la iska garan karo ku dhaceen, xubin, waax ama waxyeello shaqada jirka qayb ka mid ah ay gaarto wax u dhinnaan badani.

Hub micnaheedu waa hub, aalad, qalab, shey ama walax, nool ama aan noolayn, oo loo isticmaalo ama karti u diyaarsan leh, keenitaanka dhimasho ama dhaawac halis ah o ku yimaad qofka, la reebo kolka ereyadani ayna ku jirin middi jeebad oo leh daab leh dherer ka yar laba iyo nus inji.

U Garashada Goobta
34 CFR 300.531; WAC 392-172A-05150

Kooxda IEP waa inay go'aaminaysa goob ka duwan oo ku meelgaarka waxbarashada ee ka kaxaynta ah **Beddelka Meeleynta**, iyo ka kaxaynta ku hoos dhigan cinwaan-hoosadka **AWOODA DHEERAADKA AH** iyo **XAALADAHA GAARKA AH**, ee korka.

Qaabsocodka Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka ee Edbinta 34 CFR 300.532; WAC 392-172A-05160

Adigu waxaad xereyn kartaa codsi dhageysi nidaamka xuquuq dhowrka leh haddii aad ka soo horjeeddo:

1. Go'aan kasta oo ku saabsan meeleynta hoostiisa lagu sameeyey xeerarka edbinta; **AMA**
2. Astaanta go'aaminteeda lagu sifeeyey korka.

Degmada ayaa xereyn karta codsi dhageysi nidaamka xuquuq dhowrka leh haddii degmadu aammninsan tahay ku haynta ilmahaaga meeleynta hadda jirta inay aad suurtogal u tahay inay u keento dhaawac ilmahaaga ama kuwa kaleba.

Fiiri qaybta **Qaabsocodka Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka Leh** sidii aad ugu heli lahayd maclumaaad dheeraad ah oo ku sabasan xereynta codsiga qaabsocodka dhegeysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh.

Awoodda Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ)

Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) waa inuu socodsiiya qaabsocodka dhegeysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh oo u go'aan gaaraa. Garsooraha Sharci Maamuleed (ALJ) waxa laga yaabaa:

1. in u ku soo celiyo ilmahaaga meeleeynta laga kaxeeyey isaga ama iyada haddii Garsoore Sharci Maamuleed u garto in ka kaxayntu ay ahayd mid xadgudbeysa waxyaabaha la iskaga baahan yahay ee ku sifeysan cinwaaka **Awoodda Shaqaalaha Dugsi**, ama in anshaxa ilmuhu uu ahaa muujin ka timid naafonimada isaga ama iyada; **AMA**
2. in u amaro ka beddel meeleeynta ilmahaaga oo u ku meeleeyo goob waxbarasho duwan oo ku meel-gaar ah oo ku habboon, in aan ka badnayn 45 maalmo dugsi haddii garsooruhu (ALJ) uu u garto in ku haynta meeleeynta hadda jirtaa ee ilmaha ay si aad ah natiijadeedu u noqon doonto dhaawac ku yimaad ilmahaaga ama dadka kaleba.

Qaabsocoyadan dhageysiga ayaa laga yaabaa in lagu celiyo mar kale, haddii ay degmadu aamminsan tahay in ku celinta ilmahaaga ee meeleeyntii hore ay u badan tahay inay ku dambeyso dhaawac ku yimaad ilmahaaga ama dadka kaleba.

Mar kasta oo adiga ama degmadu codsataan dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh, codsigu waa inuu la kulmaa waxayaabaha looga baahan yahay sida lagu sifeeyey hoos imaadka cinwaanka **Qaabsocoyada codsiga Dhageysiga Nidaamka Xuquuq**

Dhowrka iyo Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka, marka laga reebo waxa soo socda:

1. Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka leh ayaa la dedejiyaa, oo waa inay dhacdaa gudaheeda laga bilaabo 20 maalin dugsi taariikheed marka la codsaday dhageysiga. Garsooraha (ALJ) ayaa ah inuu soo saaro go'aan gudahooda **10** maalmo dugsi waxa ka dambeeya dhageysiga.
2. Haddii adiga iyo degmadu ku heshiisaan mooyee, iyada oo qoraal ah, inaad iska dhaaftaan kulanka ama inaad ku heshiisaan isticmaalaka dhexdhexaadinta, waa in kulan arrimaha xalliya uu dhacaa gudaheeda **toddoba** maalmo taariikheed laga bilaabo maalinta la helo ogeysiiska codsiga dhageysiga nidaamka xuuq dhowrka leh. Dhageysiga ayaa laga yaabaa in lagu dhaqaaqo haddiii arrinta la xaliyey mooyee, taas oo ay ku qanceen labada dhinacba gudaheeda **15** maalmo taarikheed laga bilaabo maalinta la helo codsiga dhageysiga nidaamka xuuq dhowrka leh.
3. OSPI ayaa dhidibtay jadwal 2 maalmo meherdeed ah oo loogu talagalay in la soo saaro caddeynta marka codsiga dhakhsaha leh dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh la xereeyo.

Adiga iyo dugsiga ayaa dhici karta inaad bilowdaan dacwad madani ah, oo aad kaga hor-imaneysaan go'aanka oo dhageysi nidaam xuquuda dhowrista dhakhsaha leh oo si la mid ah sidii ay ugu qaadan lahaayeen go'aamada aan edbinta waxbarashada gaarka ahayn ee dhageysi nidaam xuquuda dhowrista leh (fiiri **Rafcaannada**, korka).

Meeleynta Muddada Dhageysiga Nidaamka Xuquuq Dhowrka ee Dhakhsaha leh
34 CFR §300.533; WAC 392-172A-05165

Marka adiga ama degmadu u xereyseen codsi qaab-socodka dhageysi nidaamka xuquuq dhowrka leh oo la xiriira arrimaha edbinta, ilmahaagu waa inuu (haddii adiga iyo degmadu aad heshiisaan mooyee) ku ekaata goobta waxbarashada duwan ee ku meelgaarka ah inta go'aanka sarkaalka dhageysiga laga sugayo, ama inta ay dhacayso wakhtiga muddada ka kaxaynta hoos timaad cinwaanka **Awoodda Shaqaalaha Dugsi, midkii ku horreeyaba**.

Xaq Dhowritaanka Carruurta aan Wali u Qalmin Waxbarasahda Gaarka iyo Adeegyada la Xiriira
34 CFR §300.534; WAC 392-172A-05170

Guud Ahaan

Haddii aan la go'aamin inuu ilmahaagu u-qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kale ee la xiriira, oo u jabiyo xeerka anshaxa ardayga, adigu waxaad ku difaaci kartaa dhowrista qaabsocodka arrimaha ilmahaaga haddii la ogaado in degmadu

horey ay u ogeyd in ilmahaaga ay ahayd in la qiimeeyo oo loo garto waxbarashada gaarka ah ka hor inta anshaxa keenay ficilka edbinta uuna dhicin.

Ku Saleynta Ogaanshaha ee Arrimaha Edbinta

Degmo dugsi waa in loo aamminsanaadaa inay ogeyd in ilmahaagu u-qalmo waxbarashada gaarka ah haddii, ka hor intaan anshaxa keenay ficilka edbintu uuna dhicin:

1. Adiga oo u muujiyey welwel qoraal ah shaqaalaha kormeerka ama maamuleed ee dugsiga degmo, ama macallinka ilmahaaga, in ilmahaagu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira;
2. Adiga oo codsaday qiimayn la xiriirta u qalmitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriia markay hoos timaad qaybta B ee IDEA; **AMA**
3. Macallinka ilmahaaga, ama shaqaalaha kale ee shaqeeya degmada ayaa ugu muujiyey si toos ah welwel gaar ah oo ku saabsan anshaxa isdaba joogga ah oo uu muujiyey ilmahaagu maareeyaha degmada waxbarashada gaarka ah, ama maamulitaanka kale ee shaqaalaha degmada.

Waxa ka Reebban

Degmada loo aamminsanaan maayo inay aqoon u lahayd arrintan oo kale haddii:

1. Adigu aadan u oggolaan in la qiimeeyo ilmahaaga ama aad diido adeegyada waxbarashada gaarka ah; **AMA**
2. Ilmahaaga ayaa oo qiimeeyey oo loo gartay inuu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Shuruudaha lagu Dhaqmayo Haddii ayna Jirin Wax Lagu Saleeyo in Arrinta La Ogaa

Haddii degmadu ayna ogeyn in ilmahaagu u qalmo waxbarashada gaarka ah, ka hor intaan lagu qaadin tallaabooyinka edbinta ilmahaaga, sida kor lagu soo sifeeyeyna ee hoos timaadda cinwaanka **Ku Saleynta Ogaanshaha ee Arrimaha** iyo **Waxa ka Reebban,** ilmahaaga ayaa laga yaabaa in lagu qaado tallaabooyinka edbinta ee lagu aaddiyo ardayda aan naafonimada aan lahayn ee ku dhaqaaqa akhlaaqyada noocaas oo kale ah.
Hase ahaatee, haddii adiga ama degmadu codstaan in qiimayn lagu sameeyo ilmahaaga muddada wakhtiga u isagu ama iyadu lagu qaadayo tallaabooyinka edbinta ah, qiimaynta waa in loo sameeyaa si dhakhso leh.

Illaa inta qiimayntu Dhammaanayso, ilmahaagu wuxu sii joogi doonaa meelayn waxbarasho oo ay magacaabaan xafiiska dugsigu, oo ay ka mid noqon karaan ka ahakin ama eryitaan aan lahayn adeegyo waxbarasho.

Haddii loo garto ilmahaaga inuu u-qalmo adeegyda waxbarashada gaarka ah, iyada oo la tixgalinayo macluumaadka laga keenay qiimeynta ay sameysay degmadu, iyo

macluumaad aad adigu bixisay, ayaa degmadu tahay inay siiso ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira oo la raaco waxayaabaha looga baahan yahay edbinta ee korka lagu sifeeyey.

U Diritaanka iyo Fulinta Ficilka Sharci Iyo Masu'uuliyiinta Maxkamadeed
34 CFR §300.535; WAC 392-172A-05175

Qaybta B ee IDEA ma:

1. Mamnuucayso degmada dugsi inay ka warbixiso dambiga u galay ilmaha u qalma waxabarshada gaarka ah masu'uuliyiinta arrinta ku habboon; **AMA**
2. Hor-istaageyso meelmarinta sharciga ee gobolka iyo masuuliyiinta maxkamadaha inay dhaqan galiyeen masuuliyadda saaran taasi oo la xiriira dhaqan-galinta sharciga dawladda dhexe iyo ta gobolkaba dambiyada uu geysto ilmahaagu.

Gudbinta Diiwaannada

Haddi ay degmadu ka warbixiso dambi u galay ilmahaagu, degmadu waa inay:

1. Waa inay hubisaa in la soo gudbiyey nuqullada diiwaannada waxbarashada gaarka ah iyo tallaabooyinkii edbinta diiwaansan ee ilmaha si ay u eegaan masuuliyiinta warbixinta dambiga ay haya'ddu u gudbisay, **IYO**
2. Waxa laga yaabaa inay ugudbiyaan nuqullada waxbarashada gaarka ah iyo tallaabooyinkii qoraalka diwaansan ee ilmahaaga oo kaliya illaa intay oggoshahay FERPA.

Uga-Baahanida Meeleynta Goa'aan Dhinac Kaliya ah ee Waalidintu ay ugu Meeleeyaan Ardayada Dugsiyada Gaarka ah iyada oo Dowladdu Kharashka Qabto
CFR § 300.148; WAC 392-172A-04115

Haddii aad aamminsantahay in degmada dugsi ayna siin karin FAPE ilmahaaga oo aad doorato inaad qorto ilmahaaga dugsi gaar loo leeyahay iyada oon degmadu oggolaan, waxa jira tallaabooyin gaar ah oo ay tahay inaad raacdo sidii aad uga codsan lahayd inay kuu celiyaan degmadu waxayaabaha loogu talagalo dugsiga gaarka ah.

Dib-ugu-Celinta Loogu Talaagalay ku Meeleynta Dugsiga Gaarka ah

Haddii u ilmahaagu horay uga helay degmada dugsi waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, oo adigu aad ku go'aansatay inaad qorto ilmahaaga dugsi gaar ah oo dugsi-hore, dugsiga hoose, ama dugsi sare ah, iyada oo aan degmadu oggolaan ama soo gudbin degmadas ka heli oggolaansho gudbinta, maxkamad ama Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) ayaa laga yaabaa inuu degmada ku amro inay kuu celiso

adiga kharashkii qoritaanka dugsi, haddii maxkamad ama garsoore (ALJ) ogaado ineyna degmadu u diyaarin FAPE ilmahaaga wakhtiga iyada oo dhowreysa ka hor intaan la qorin dugsiga gaarka ah iyo in ku meeleynta dugsiga gaarku wax habboon ay tahay.
Maxkamad ama Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) ayaa u garan kara in meeleyntaadu ay tahay mid habboon, xitaa haddii meeleyntu la kulmin heerarka gobolka looga baahan yahay ee ku aaddan waxbarashada ay bixyaan degmoonyinka dugsi.

Xaddidka Lacag Dib-ugu-Celinta

Kharashka lacag dib-ugu-celinta sida lagu sifeeyey xubinta qoraalka ee korka ayaa waxa laga yaabaa in la yareeyo ama la diido:

1. Haddii: 1. (a) IEP-gii shirkii ugu dambeeyey ee aad ka qayb-gashay ka hor inta aanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dowladda, adigu aadan la socodsiin Kooxda IEP xubnahooda inaad diiddantahay meelaynta degmadu soo jeedisay in ilmahaaga la siiyo FAPE, oo ay ku jirto welwelka adigu aad ka qabto arrinta iyo ujeeddadaada ah inaad ilmahaaga qortid dugsi gaar loo leeyahay iyada oo ay kharashku saran yahay dowladda; ama (b) Ugu yaraan 10 cisho oo ah maalmaha shaqooyinka (marka lagu daro maalmaha ciidaha ah ee ku soo beegma maalin shaqo) intaanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dowladda, adiga oon siin degmada ogeysiis goran oo ku saabsan macluumaadkaas;
2. Haddii ka hor inta aanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dowladda, degmadu ku siisay ogeysiis hore oo qoran, oo ujeeddadaaduna tahay inaad qiimeyso ilmahaaga (oo ay ku jirto kelmado sheegaya ujeeddada qiimeynta ku habboon oo macquul ah), laakiin adigu aadan ilmahaaga u keenin in la qiimeeyo, **AMA**
3. Markay maxkamadu garato inay ficilladaadu ayna ahayn kuwo macquul ah.

Hase yeeshe, kharashka lacag dib-ugu-celintu;

1. Waa inaan la yareyn ama la diidin maadaama aad sii weydey ogeysiiska haddii: (a) u dugsigu kaa hor-istaago inaad bixiso ogeysiiska; (b) adiga oon helin ogeysiiska masuuliyaddaada inaad bixiso ogeysiiska kor lagu sifeeyey; ama (c) u hggaansanida shuruudaha kor ku qoran inay ugu badan tahay inay ilmahaaga waxyeelo jirka ah u geysato; **IYO**
2. Laga yaabo, go'aan maxkamadeed ama Garsooraha Sharci Maamuleed (ALJ), waa inaan la yareyn ama la diidin maadaama aad bixiin weydey ogeysiiska haddii: (a) adigu aadan ahayn qof wax qora ama akhriya ama aadan qori karin Ingiriisiga; ama (b) iyada oo loo hoggansamayo waxyaabaha la iskaga baahan yahay korka ay sida ugu badan ku dambeyn doonto waxyeello daran oo shucuurta ku timaad ilmahaaga.

Khayraadka

Ururadan dadweynuhu fuundeeyaan ayaa bixin kara macluumaad dheeraad ah oo ku

saabsan adeegyada waxbarashada gaarka gudaheeda Gobolka Washington.

Washington PAVE
6316 So. 12th St.
Tacoma, WA 98465
(253) 565-2266 (v/tty)
1-800-5-PARENT (v/tty)
Fax: (253) 566-8052 wapave9@washingtonpave.com

Disability Rights Washington
(DRW)
315 5th Ave. S. #850
Seattle, WA 98104
(206) 324-1521
(800) 562-2702
TDD: (800) 905-0209
disabilityrightswa.org

Kristin Hennessey, Ombudsman
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504
(360) 725-6075
Kristin.Hennessey@k12.wa.us